HERITAGE INSTITUTE



# Samaynta Goobashaqo oo Amni u ah Haweenka Soomaaliya

Nofeembar 2024

## Ku Saabsan Qoraayada

**Dr. Ladan Caafi,** waa PhD, waxaanay bare-kalkaaliye sare ka tahay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Jaamacadda Zayed University oo ku taalla Isutagga Imaaraadka Carabta. Yaalaaba cilmibaaristeedu waxa ay xoogga saartaa arrimaha haweenka, nabadaynta iyo siyaasadda. Daraasadaha ay Ladan samaysay waxa ka mid ah; Qurbajoogta iyo saamaynta ay ku leedahay horumarka,khilaafka iyo dowladnimada iyo Ilaalinta khayraadka badaha Geeska Afrika. Waxa kale oo ay wax ka qortay Haweenka iyo Nabadaynta Afrika (2021 James Currey), oo ah cilmibaaris ballaaran oo ku saabsan haweenka iyo siyaasadda, taas oo laga sameeyay shan dal oo Afrikaan ah oo dagaallo ka soo baxay.

**Saynab M. Xasan,** waa Asaasaha iyo Agaasimaha Guud ee Dhaqdhaqaaqa Sinnaanta Jinsiga Soomaaliya (Somali Gender Equity Movement). Sida oo kale waa lataliye madaxbannaan, cilmibaare iyo tababare la shaqeeya deeqbixiyeyaasha, ururrada caalamiga ah, ururrada maxalliga ah iyo haayadaha dowladda. Saynab waxa ay ka mid ahayd xeeldheerayaashii sameeyay Sharciga Dibuheshiisiinta Qaranka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Faderaalka iyo Dibuheshiisiinta Soomaaliya. Waxa ay shahaadada heerka labaad(master) ka diyaarisay arrimaha bulshada, iyada oo ka qaadatay Humphrey School of Public Affairs ee University of Minnesota oo ku taalla dalka Maraykanka.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2024.**

# Contents

**1. Nuxurka Daraasadda** 4

Talooyin xul ah 7

**2. Hordhac** 8

**3. Habraaca Daraasadda** 9

Sifooyinka Kaqaybgalayaasha Cilmibaarista 11

**4. Milicsiga Haweenka iyo Goobta shaqada** 11

Jaantuska 1: Horumarka Jinsiga ee Dalalka IGAD 12

Shaxda 1: Haweenka Dowladda u Shaqeeya 14

Shaxda 2: Dhallinyaro aan haysan Waxbarasho, Shaqo iyo Tababarro Toonna 15

**5. Isbeddellada Hadda Jira ee Haweenka ku Sugan Goobaha Shaqada** 15

Jaantuska 2: Xaddiga Cududda Shaqaalaha ee ku Salaysan Jinsiga 18

Jaantuska 3: Haween ka Shaqeeya Qaar ka Mid ah Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay (%) 19

**6. Caqabadaha Haweenku Kala Kulmaan Goobaha Shaqada** 20

**7. Caqabadaha Dhaqan iyo Bulsheed ee Ka Haysta Haweenka Goobaha Shaqada** 21

**8. Xayeysiisyada Shaqada** 21

**9. Dallacsiinta** 23

**10. Siyaasadaha iyo Sharciyada Lagu Maamulayo Xuquuqda Shaqaalaha** 24

**11. Maqnaanta Adeegyada Daryeelka Dumarka** 26

**12. Gunaanad** 30

**13. Talabixino** 31

# 1. Nuxurka Daraasadda

Soomaaliya waxa ay dib-u-dhis ku waddaa oo ay sagxadda ka soo qaadday dhammaan haya'daheeda siyaasadeed, kuweeda dhaqaale iyo kuweeda bulsho, oo ay dhammaantood burburiyeen dagaallo tobannaan sano soo taxnaa. Si yoolkaas looga gun-gaaro, waxa lagama maarmaan ah in ay Soomaaliya ku bixiso hanti iyo tamar walba oo ay heli karto sida kartida aqooneed ee dadkeeda. Haweenka oo dadweynaha Soomaaliya ka noqonaya 52.7% weli waa la qoqobaa dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaanba.[1] Sidaa oo kale dumarku waa ay ka badsadaan ragga mas'uuliyadda qoyska miyi iyo magaalaba, taas oo muhiim ka dhigaysa in la xaqiijiyo, korna loo qaado madaxbannaanida dhaqaalaha haweenka Soomaaliya.[2] Sidaas darteed, waxa ay cilmibaaristani si weyn ugu kuurgalaysaa doorka ay haweenku ku leeyihiin goobaha shaqo ee waaxaha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo sidaa oo kale ururrada samafalka ee Soomaaliya. Waxa kale oo ay raacdaynaysaa caqabadaha ay haweenku la kulman iyo siyaalaha lagaga bixi karo caqabadahaas.

Soomaaliya waa dal da'yar oo curdin ah, oo ay dadkiisa 75% ka yar yihiin 30 sano. Waxa kale oo ay Soomaaliya la daalaadhacaysaa shaqo la'aan baahsan oo gaarsiisan 60% taas oo soo food-saartay guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaanna kooxaha nugul sida haweenka, dhallinyarada, barakacayaasha iyo dadka reermiyiga ah.[3] Maadaama Soomaaliya u gaashaamatay la dagaallanka al-Shabaab, waxa istaraatiijiyadahaas ka mid noqon kara yaraynta shaqo-la'aanta dhallinyarada ee baaxadda leh. Sidaas darteed, waa in ay Soomaaliya kor u qaaddo fursadaha shaqo si loo dhimo taageerada kooxaha xagjirka ah, oo ka faa'iidaysta shaqo-la'aanta dhallinyarada.[4]

Sidaa oo kale, kordhinta xaddiga haweenka ka shaqeeya waaxaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn waxa ay gacan ka gaysanaysaa xasiloonida dalka, iyada oo ballaarinaysa cududdiisa shaqaale, korna u qaadaysa waxsoosarka dalka gudihiisa isla markaana wanaajinaysa sookabashadiisa dhaqaale (GPD).[5]

Cilmibaaristan ayaa adeegsanaysa habraac-cilmibaariseed oo loo yaqaanno tayo-beeg (qualitative research methods), iyada oo ka duulaysa doodo loo qabtay kooxo xul ah iyo waraysiyo laga qaaday daneeyeyaal xog-ogaal ah. Doodaha waxa lagu qabtay magaalada Gaalkacayo, iyaga oo ka qaybgalayaashu ka koobnaa dad ka kala yimid qaybta Puntland iyo qaybta Galmudug, waxa kale oo doodo lagu qabtay magaalooyinka Garoowe (Puntland) iyo Muqdisho (Maamulka Gobolka Banaadir). Shaqooyinkan oo dhan waxa la qabtay muddadii u dhexaysay bishii Jannaayo iyo Abril 2024. Dadkii ka qaybgalay daraasaddan waxa ay da'doodu u dhexaysay 18 illaa 67 jir.

1. Mohamoud, Nimo, Abdisalan Y. Artan & Hussein Abdulahi (March 2024) "Assessment of Women's Economic Participation in Somalia" Mogadishu: National Economic Council of Somalia.
2. The population of women-headed household is highest in urban areas (56.5 percent), compared to men (43.4 percent). Similarly, in rural areas the number of female-headed household (52.6 percent) is higher than families headed by men (47.4 percent). Only within nomadic communities do men (66.6 percent) significantly outnumber women (33.4 percent); Women and Men in Somalia (2023); Mogadishu: Somalia National Bureau of Statistics.
3. The Somalia National Development Plan 2020-2024 (NDP-9 2019) (January 5, 2020); Mogadishu: The Ministry of Planning, Investment and Economic Development. Available at: https://mop.gov.so/somali-national-development-plan-9-2020-2024/
4. Adelaja, Adesoji and Justin George (October 2020) "Is Youth Unemployment Related to Domestic Terrorism?" Perspectives on Terrorism, Vol. 14, No. 5, pp. 41-62.
5. "Assessment of Women's Economic Participation in Somalia" (March 2024) Mogadishu: National Economic Council of Somalia.

Xogtan ayaa muujinaysa in dadyowgii ka qaybgalay cilmibaaristani u badnaayeen dhallinyaro. Marka loo eego xaaladda guurka, kaqaybgalayaasha badankoodu waxa ay ahaayeen gashaantimo, waxaana ku soo xigay haweenka carmalka ah. Arrintan ayaa abuurtay in haweenku ka daahaan guurka, sababta oo ah waxa ay dhabarka u ritaan masuuliyadda qoysaskooda, iyaga oo dakhligooda u adeegsada daryeelka qoysaskooda. Tani waxa ay muujinaysaa in ay jiraan haween tiro badan oo masuul ka ah qoysaskooda. Marka loo eego heerka waxbarashada, kaqaybgalayaasha badankoodu waxa ay haystaan shahaadada heerka kowaad ee jaamacadda. Taas lidkeedana heerka waxbarasho ee haweenku waa mid aad u hooseeya marka la barbardhigo ragga. Ku dhowaad kala bar, ayaa kaqaybgalayaasha ka shaqeeya Ururrada Bulshada Rayidka ah iyo Ururrada aan Dowliga ahayn. Tani waxa ay muujinaysaa in haya'daha aan rasmiga ahayni soo jiidanayaan haweenka, waxaana soo raaca waaxaha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo ay ka shaqeeyaan haweenka ugu tirada yar.

Inkasta oo ay jiraan kala duwanaansho goboleed oo ay ka mid yihiin tirada dadweynaha, dhaqdhaqaaqyada dhaqaale iyo xaaladaha amni ee u dhexeeya magaalooyinka Gaalkacayo, Garoowe iyo Muqdisho, iyo kala duwanaansho kale oo la xiriira da'da, waxbarashada iyo khibradaha shaqo, haddana natiijooyinkani waxa ay muujiyeen in ay haweenkii ka qaybgalay daraasaddani la kulmaan caqabado isku wada mid ah. Khibradda haweenka iyo sida looga la dhaqmo goobaha shaqada waxa ay ku xiran tahay dhowr waxyaalood oo ay ka mid yihiin da'da, muuqaalka jidheed, heerka waxbarasho, iyo qabiilka ay ka dhalatay gabadhu, iyo weliba midka ay deggen tahay dalka gudihiisa iyo dibeddiisa. Haweenka da'da weyn, waxbartay, xaaska ah, kana dhashay reeraha laandheeraha ah ee difaaci kara, waxa ay la kulmaan handidaad ama faraxumayn ka yar kuwa ay la kulmaan haaweenka da'da yar, aqoonta yar, soo jiidashada jidheed leh, ka dhashay qabiillada awoodda yar.

Aragtiyaha taban ee raganimada ku salaysan ayaa saamayn ku leh dumarka jooga goobaha shaqada. Qaar badan oo ka mid ah dadkii la waraystay ayaa xusay in si cad ragga loo doorbido goobaha shaqada, oo ay jiraan aamminaado si weyn ugu faafay goobaha shaqada oo ragga u sedburinaya, isla markaana qaba in dumarku guur iyo guri joog u dhaxeeyaan.[6] Tusaale ahaan, xubno ka mid ah haweenkii doodaha loogu qabtay Gaalkacayo ayaa sheegay in raggu ku yiraahdaan "haweenku ha joojiyaan shaqada oo muhiimadda ha siiyaan dhalmada iyo xannaanada ubadka." Sidaa oo kale, waxa loo arkaa in ay raggu ka hawl-karsan yihiin dumarka, kagana dhiirran yihiin qaadashada go'aannada halista ah, kuwaas oo ah sifooyinka ay ku qiimeeyaan goobaha shaqadu, gaar ahaan waaxaha gaarka loo leeyahay. Guud ahaan xubnaha ka tirsan beelaha yaryar waa la tunjileecsadaa, waa la liidaa, laakiin gaar ahaan dumarka reerahaas ka dhashaa waxa ay la kulmaan takoor dheeraad ah.

6. Focus Group Discussion, Galkayo, January 30, 2024

Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa gaarka ahiba waxa ay leeyihiin habraacyo kala duwan, laakiin waxa ay ka midaysan yihiin caqabado badan oo ay haweenku la kulmaan marka ay shaqa-doonka yihiin. Ragga iyo dumarka kala si baa loo la dhaqmaa marka ay shaqooyinka codsadaan. Inta aan la eegin aqoontooda iyo khibraddooda waxa dumarka lagu qiimeeyaa da'dooda, muuqaalkooda iyo sida ay uga go'an tahay baahida shaqo raadintu. Tani waxa ay ragga u ogolaanaysaa in ay dumarka uga faa'iidaystaan baahidooda, kuna xiraan in ay shaqaalaysiinta ama shaqo sii wadidda ugu beddelaan fulinta fursado galmo. Qaar badan oo ka mid ah kaqayb-galayaashii daraasaddan ayaa xusay in haweenka ka shaqeeya waaxaha kala duwan laga soo bilaabo xubno baarlamaan illaa heer maamul oo shaqo ay u baahan yihiin in ay rag gacanqabtaan, oo ay dabada ka riixaan codsiyadooda shaqo. Sida oo kale ragga iyo dumarku waxa ay shaqo raadinta u maraan habab kala duwan. Tusaale ahaan, raggu marka ay shaqo raadinayaan waxa ay abaabulaan oo ay raacaan xadhkaha qabiilladooda.

Guud ahaan, kaqaybgalayaasha daraasaddu waxa ay isku raacsan yihiin in aan jawiga shaqadu ahayn kuwo haweenka soo dhowaynaya, oo ay takoor, soocitaan iyo handadaadba kala kulmaan dumarku. Qof cilmibaaristan lagu waraystay ayaa yiri, "qaab-dhismeedka goobaha shaqada, ha ahaadeen kuwa dowliga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay, dhammaantood ma soo dhawaynayaan haweenka, kuwaas oo aan inta badan haysannin goobo shaqo oo ay si hufan ugu gutaan waajibaadkooda shaqo." Go'aannada shaqaalaysiinta, dallacaadda shaqaalaha iyo go'aannada kale ee la xiriira shaqada waxa inta badan lagu gaaraa meelo ka baxsan goobaha shaqada, halkaas oo ay kulanno aan caadi ahayn isugu yimaaddaan rag khaas ahi. Tani waxa ay ka dhigan tahay in xataa marka dumarka la shaqaalaysiinayo aanay inta badan ku jirin heerka hoggaaminta, oo ay ka maqan yihiin jagooyinka mushaharka badan. Sida ay sheegtay gabar jaamacad ka baxday oo ka shaqaysa haayadaha gaarka loo leeyahay, dumarka goobaha shaqada kala kulma dhibaatooyinka ugu badan, ayaa ah kuwa ka waxbarashada sarreeya, ka xirfadda fiican, ka hammiga badan, kana firfircoon ragga ay isku goobta ka shaqeeyaan. Dumarka da'doodu u dhexayso 40-aadka ilaa 50-neeyada ee aqoonta sare leh, ee ka yimid qurbaha oo ah haween iskood isu taagi kara ayaa loo arkaa in ay yihiin cidda dhibta abuuraysa ee "dumarnimada u ololaynaysa,"(feminist), kuwaas oo dalka keena fikrado iyo dhaqanno reer galbeed.

Mid ka mid ah siyaabaha ay dumarku ku helaan fursado shaqo oo caddaalad ah ayaa ah marka ay u tartamaan shaqooyinka ay maalgaliyaan ururrada caalamiga ahi ee shuruudda ka dhigaya ka mid noqoshada haweenka. Tusaale ahaan, sarkaal sare oo dowladda ka tirsan ayaa sheegay in "haddii ay Bangiga Adduunka ka bannaan yihiin shan boos- oo ay ka mid yihiin isuduwe, shaqaalaysiiye, qasnaji, iyo khabiir ku takhasusay badbaadada bulshada iyo jinsiga - waxa haweenka la siinayaa oo kali ah booska jinsiga, halka afarta boos ee kale laga siinayo ragga."

Marka shaqaale la doonayo waxa inta badan la soo xayaysiiyaa shaqooyin lagu dhiirrigalinayo in ay haweenku soo codsadaan, laakiin waxa jirta in si cad loo daneeyo shaqaalaysiinta ragga oo la aamminsan yahay in ay ka karti badan yihiin haweenka. Sida oo kale waxa la rumaysan yahay in raggu masuul ka yihiin biilka iyo daryeelka qoysaskooda. Dhanka kale, waxa la aamminsan yahay in ay haweenku mushaharkooda u isticmaalaan naftooda, dharkooda iyo dhaashigooda oo kali ah.

Cilmibaaristan waxa ay faallaynaysaa caqabadaha soo foodsaara haweenka, gaar ahaan marka ay u shaqatagaan waaxaha dowliga ah, kuw gaarka loo leeyahay iyo kuwa samafalka. Waxa aannu u kuurgalaynaa fahanka caqabadaha ay haweenku kala kulmaan goobaha shaqada sida shaqaalaysiinta, dallacsiinta iyo jawiga goobaha shaqada ee ay ka midka yihiin fursadaha ay xafiisyada ku haystaan iyo goobaha ay ku tukanayaan ee loogu talo galay salaadda. Waxa kale oo aannu baaraynaa handadaadaha kala duwan ee ay haweenku kala kulmaan goobaha shaqada, iyo istaraatiijiyadaha loo baahan yahay in ay dumarku qaadaan si looga gaashaanto caqabadahan. Waxa aannu ku gunaanadayna talooyin kor loogu qaadayo shaqada haweenka, iyada oo la yaraynayo handadaadaha ay kala kulmaan goobaha shaqada.

## Talooyin xul ah

- Waxa jira shuruuc iyo siyaasado kooban oo ilaalinaya xuquuqda haweenka ku sugan goobaha shaqada.  Sidaas darteed, waa in la dhammaystiro, si dhaqso ahna loo hirgaliyo Xeerka Shaqaalaha ee Qabyo-qoraalka ah (nuqulka 3-aad);
- Waa lama huraan in uu xuquuqda haweenka ilaaliyo Dastuurka Faderaalka ee Kumeelgaarka ahi. Sidaad darteed, waa in ay Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dowladaha xubnaha ka ah faderaalkuba qaataan oo ay hirgaliyaan xeerarka shaqada ee ilaalinaya haweenka shaqaalaha ah.
- Marka loo eego hannaanka shaqaalaysiinta, waa in haweenka la siiyaa fursado shaqo oo ay si caddaalad ah ugu la tartamaan ragga, oo ay ka mid yihiin in shaqaalaha dowladda haweenka qoondo aysan ka hoos mari karin looga xiro. Sidaas oo kale, waa in waaxaha shaqada oo dhan laga hirgaliyaa nidaam daahfuran oo lagu dallacsiinayo shaqaalaha;
- Waa muhiim in la qiimeeyo qaab-dhismeedka goobaha shaqada ee guud ahaan waaxaha kala duwan ee shaqada si loo hubiyo in ay haweenku helaan fursado la mid ah kuwa ay raggu ka helaan adeegyada shaqo ee looga baahan yahay goobaha shaqada. Waxaa kuwan ka mid ah goob xafiis ahaan ugu filan, goobo nadiif ah oo ay haweenku ku tukadaan iyo sida oo kale qolka hooyooyinka. Ha noqoto waaxda dowliga ah ama ta gaarka loo leeyahay, guud ahaan ba way xaddidan yihiin suulliyada haweenku, tanina waa arrin lama huraan ah oo ay tahay in dhakhso wax looga qabto;

- Waxa jira caqabado waaweyn oo hablaha/gabdhaha ka haysta dhanka waxbarashada. Marka la joogo goobaha waxbarashada, wiilasha iyo raggu aad bay uga badan yihiin hablaha iyo haweenka. Fursadaha waxbarasho ee gabdhaha waxaa kor loogu qaadi karaa in bilaash laga dhigo waxbarashada dalka;
- Maamullada jira, sida dolwadda faderaalka, dowlad-goboleeyada iyo dowladaha hoose ba, waa in ay ka shaqeeyaan guuleysashada haweenka iyaga oo ku xaqiijinaya in ay haweenka  siiyaan taageero dhaqaale,  mid farsamo iyo mid bulshaba;
- Waxa baahi weyn loo qabaa in la suuragaliyo fursado maaliyadeed oo ay haweenku ku helayaan dhaqaale sida in ay samaystaan akoonno bangi, waxbarasho lagu kobcinayo aqoontooda asaasiga ah iyo sida oo kale tababarro ku salaysan ganacsiga iyo codsiyada maalgalinta iyo daymaha bangiyada.

# 2. Hordhac

Soomaaliya waxa ay ka soo kabanaysaa dagaal sokeeye oo qaatay labaatan sannadood, kaas oo tirtiray dhammaanba hay'adihii dowliga ahaa ee Soomaaliya. Dib-u-dhiska dowladda waxa lagu soo yagleelay shirkii dib-u-heshiisiinta Carta ee 2000. Tan iyo maalintaas waxa ay Soomaaliya u halgamaysay dib-u-dhiskeeda siyaasadeed, midkeeda dhaqaale iyo sida oo kale dib-u-dhiska haya'daheeda bulsho. Dib-u-dhiska Soomaaliya, waxa uu u baahan in lagu maalgaliyo guud ahaanba khayraadka dalka oo ay ka mid yihiin karaan bulshada (maanka iyo muruqa bulshada) oo lafdhabar u ah sookabashadaas, gaar ahaan haweenka oo 52.7% ka ah dadweynaha Soomaaliya.[7]

Sidaas darteed, waxa ay cilmibaaristani si weyn ugu kuurgalaysaa doorka ay haweenku ku leeyihiin kaqaybgalka goobaha shaqo ee waaxaha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo sida oo kale ururrada samafalka ee Soomaaliya. Waxa kale oo ay raacdaynaysaa caqabadaha ay haweenku la kulman iyo siyaalaha looga bixi karo caqabadahaas.

Dhowr sababood ayaa muhiim ka dhigaya cilmibaaristan. Marka kobaad, Soomaaliya waa dal yar oo curdin ah, oo ay dadkiisa 75% ka yar yihiin 30 sano. Waxa kale oo ay Soomaaliya la daalaadhacaysaa shaqo la'aan baahsan oo gaarsiisan 60%, taas oo soo foodsaartay guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaanna kooxa nugul sida haweenka, dhallinyarada, barakacayaasha iyo dadka reermiyiga ah.[8] shaqo la'aantan ba'an, ee sida gaarka ah u taabatay dhallinyarada, ayaa waxa inta badan ku lammaan xasiloonidarro siyaasadeed, maadaaba Soomaaliya u gaashaamatay la dagaallanka al-Shabaab. sidaas darteed, waa in ay Soomaaliya kor u qaaddo fursadaha shaqo si loo dhimo taageerada kooxaha xagjirka ah, oo ka faa'iidaysta shaqo la'aanta dhallinyarada. [9]

7. Mohamoud et al. (March 2024)
8. The Somalia National Development Plan 2020-2024 (NDP-9 2019) (January 5, 2020); Mogadishu: The Ministry of Planning, Investment and Economic Development. Available at: https://mop.gov.so/somali-national-development-plan-9-2020-2024/
9. Adelaja, Adesoji and Justin George (October 2020) "Is Youth Unemployment Related to Domestic Terrorism?" Perspectives on Terrorism, Vol. 14, No. 5, pp. 41-62.

Mar labaadka, maadaama haweenku ka badan yihiin ragga, waa lama huraan in awooddooda shaqo looga faa'iidaysto sookabashada iyo hurmarka dhaqaalaha Soomaaliya. Daraasaduhu waxa ay muujinayaan faa'iidada ay leedahay in haweenka laga qaybgaliyo ilaha dhaqalaaha sababta oo ah waxa ay badiyaan xaddiga shaqaalaha, waxaanay wanaajiyaan koboca waxsoosarka guud ee dalka gudihiisa (GPD).[10]

Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2020-2024 (NDP-9 2019) ayaa tilaamaya dowladnimada itaalka daran, amni la'aanta, fulin la'aanta sharciga, masiibooyinka dabiiciga ah, khilaafaadka iyo xasiloonidarrada siyaasadeed ee ka dhashay saboolnimada.[11] Sidan ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka , 70% dakhliga soo gala qoysaska Soomaaliya waxa soo saara haweenka, balse haweenka aad bay ugu yaryihiin hay'adaha rasmiga ah, gaar ahaan kuwa dowliga ah iyo kuwa gaarka loo yahay. Sida dalalka kale ee sookoraya, shaqooyinka haweenka Soomaalidu waxa ay ku badan yihiin waaxaha aan rasmiga ahayn, waxaanay goobaha shaqadan ka yihiin boqolkiiba todobaatan (70%).[12] Inta badan waxa ay ka shaqeeyaan ururrada aan dowliga ahayn, ganacsiyada yaryar iyo meherado qoysaskoodu leeyihiin.[13] Sida ay sheegtay Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadamaha (2020), ganacsiyada yaryar ee Soomaaliya in ka badan 60% waxa iska leh haweenka.[14]

Cilmibaaristani waxa ay ku doodaysaa in caqabadaha soo foodsaara haweenka, gaar ahaan kuwa ka soo wajaha waaxaha dowliga ah, kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa samafalka, iyada oo sharraxaysa sida ay haweenka Soomaalidu ugu xaqiran yihiin goobaha shaqada. Waxaannu doonaynaa in aannu fahanno caqabadaha ay haweenku kala kulmaan goobaha shaqada, sida shaqaalaysiinta iyo dallacsiinta iyo weliba jawi shaqo oo soo dhowayn leh, oo ay ka mid yihiin helitaanka xafiisyo ku filan iyo goobo diyaarsan oo ay haweenku ku tukadaan. Waxa kale oo aannu baaraynaa handidaadaha kala duwan ee ay haweenku kala kulmaan goobaha shaqada, iyo istaraatiijiyadaha loo baahan yahay in ay dumarku qaadaan si looga gaashaanto caqabadahan. Waxa aannu ku gunaanadayna talooyin kor loogu qaadayo shaqada haweenka, iyada oo la yaraynayo handidaadaha ay kala kulmaan goobaha shaqada.

# 3. Habraaca Daraasadda

Cilmibaaristan ayaa adeegsanaysa habraac-cilmibaariseed oo loo yaqaanno tayo-beeg (qualitative research methods), iyada oo ka duulaysa doodo loo qabtay kooxo xul ah iyo waraysiyo laga qaaday dad xog-ogaal ah oo ay ka mid yihiin daneeyeyaal muhiim ah.

---

10. "Assessment of Women's Economic Participation in Somalia" (March 2024) Mogadishu: National Economic Council of Somalia.
11. The Somalia National Development Plan 2020-2024 (NDP-9 2019) (January 5, 2020).
12. Duval, A. (2020). Sectoral Assessment of Women's Entrepreneurship Development in the Agriculture and Renewable Energy Sectors in Somalia. Conducted in the framework of: The ILO's Project "Public Private Development Partnership for Renewable Energy Skills Training and Women's Economic Empowerment".https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/---ed_emp/---emp_ent/---ifp_seed/documents/publication/wcms_757371.pdf
13. Nelson-Nunez, Jami and Christopher Cyr (2019) "Women's Work in Fragile States: Evidence From a Firm-Level Dataset in Somaliland" Social Politics, Volume 26, Number 3.
14. "Somali Women Forging Alliances to Safeguard Equal Rights for All" (October 2020) Ministry of Women and Human Rights Development; Mogadishu: Federal Government of Somalia.

Doodaha waxa lagu qabtay magaalada Gaalkacayo, iyaga oo ka qaybgalayaashu ka koobnaa dad ka kala yimid qaybta Puntland iyo qaybta Galmudug, waxa kale oo doodo lagu qabtay magaalooyinka Garoowe (Puntland) iyo Muqdisho (Maamulka Gobolka Banaadir). Shaqooyinka xogaruurinta oo dhan waxa la qabtay muddadii u dhexaysay bishii Jannaayo iyo Abril 2024.

Ururrada maxaliga ah ee ka jira magaalooyinka la xushay, oo ay ka mid yihiin Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage (HIPS), Xarunta Horumarinta iyo Cilmibaarista Puntland (PDRC), Dhaqdhaqaaqa Sinnaanta Jinsiga Soomaaliyeed (SGEM), iyo Mu'asasada Caasha Geelle (TAS), ayaa naga caawiyay in aannu si qotadheer u darisno saamaynta ay arrintani ku leedahay in ay haweenka Soomaaliya si bed-qab leh uga shaqeeyaan goobaha.

Waydiimaha cilmibaaristan waxa lagu diyaariyay af Ingiriisi iyo af Soomaali. Lataliyaha iyo xog ururiyayaasha ayaa dajiyay shuruudaha daraasadda ka hor intii aan la waraysan kaqaybgalayaasha. Su'aalo isku mid ah ayaa ka qaybgalayaasha lagu waydiiyay af Soomaali, kadibn jawaabihii kaqaybgalayaasha waxa lagu turjumay Ingiriisi. Intii waraysiyada iyo doodaha lagu guda jiray, si hufan ayaa loo duubay dhammaan jawaabihii ay bixiyeen kaqaybgalayaashu.

Waxa kale oo ay cilmibaaristani milicsanaysaa dhigaallo hore, gaar ahaan kuwo Dowladda Faderaalka Soomaaliya iyo Ururrada Caalamiga ah sida Bangiga Adduunka iyo haayadaha Qaramada Midoobay. Inta badan cilmibaarisaha laga sameeyay Soomaaliya si ballaaran uma qiimeeyaan doorka haweenka, waxaanay cilmibaarisaha haweenka ku salaysani ku kooban yihiin siyaasadda iyo arrimaha bulshada, balse diiradda ma saaraan doorka ay dumarka Soomaaliya ku leeyihiin kaqaybgalka goobaha shaqada iyo sida ay uga qaybqaataan dhaqaalaha iyo horumarka dalka. Cilmibaarisaha jira ee 20-kii sano ee la soo dhaafay laga sameeyay haweenka iyo shaqada, uma gogolxaarayaan in isbarbardhig macno leh lagu sameeyo fursadaha ay ka helaan iyo caqabadaha ay dumarku kala kulmaan goobaha shaqada. Maadaama oo ay Soomaaliya siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaanba u soo xasilayso, waxa lagama maarmaan noqonaysa in la isku dubbarido, lana mideeyo dhammaan cududda shaqaale ee dalkeenna joogta, oo ay ku jiraan haweenku. Si haweenku door firfircoon ugu yeeshaan ilaha dhaqaalaha, waxa muhiim ah in la soo ururiyo xogo dhammaystiran oo iskaabaya, kuwaas oo loo adeegsan karo dajinta xeerar iyo siyaasado dhiirrigalinaya, isla markaana ilaalinaya haweenka ku sugan goobaha shaqada.

## Sifooyinka Kaqaybgalayaasha Cilmibaarista

Kaqaybgalayaashu waxa ay iskugu jiraan jiilal kala duduwan oo da'doodu u kooxaysan tahay sidan; 18 – 27 (14); 28 – 37 (6); 38-47 (8); 48-57 (6); iyo 58-67 (3). Xogbixiyayaasha cilmibaaristu waxa ay ka koobnaayeen qaybaha bulshada ballaaran, oo ah mid aad u da' yar. Siddeed xaasas bay ahaayeen, 11 carmal bay ahaayeen, 17 hablo/gabdho ayay ahaayeen, midna waa laga dhintay. Xaddiga furitaanka Soomaaliya waa mid aad u sarreeya, carruurtana waxaa inta bandan lagaga tagaa hooyooyinka. Sidaa oo kale, haweenku way ka raagaan guurka, sababta oo ah waxa ay dhabarka u ritaan masuuliyadaha qoysaskooda, dakhligoodana iyaga ayay ku daryeelaan. Tani waxa ay muujinaysaa sida uu u sarreeyo xaddiga qoysaska ee ay haweenku masuulka ka yihiin.


Aqoon ahaan, haweenka la waraystay waxa ay u badnaayeen heer jaamacadeed (30); mid baa haysatay diblooma jaamacadeed oo laba sano ah; afarna waxa ay haysteen shahaado dugsi sare, halka ay laba ka mid ahi gaareen dugsi dhexe. Tiradan badan ee ka baxday jaamacaduhu kama turjumayso in ay dumarka waxbartay ee Soomaaliya badan yihiin, marka loo eego xaddiga ay ka yihii dadweynaha Soomaaliya, halkaas oo ay waxbarasho ahaan iyo farbarasho ahaanba haweenku kaga hooseeyaan ragga. Ku dhowaad kalabar (15) ayaa kaqaybgalayaasha u shaqaynayay ururrada bulshada rayidka ah iyo ururrada aan dowliga ahayn, taas oo muujinaysa in waaxdani si weyn u u tixgaliso shaqaalaysiinta haweenka; 11 ayaa ka shaqaynayay waaxda dowliga ah, lixina waaxda gaarka loo leeyahay, labana mutadawacnimo ayay ugu shaqaynayeen ururrada bulshada rayidka ah, halka ay laba bilaa shaqo ahaayeen.

# 4. Milicsiga Haweenka iyo Goobta shaqada

Sannadkii 2022, ayuu Urarka Shaqaalaha ee Caalamiga ahi, 47% ku qiyaasay xaddiga haaweenka ee kaqaybgala cududda shaqaalaha adduunka, halka ay kan ragga ku qiyaaseen 72%. Warbixin uu Bangiga Adduunku soo saaray 2022 oo cinwaankeedu ahaa, 'Haweenka, Ganacsiga iyo Sharciga,' ayaa xustay in 2.4 bilyan oo dumarka ah, oo ku jira da'da shaqada ay dhibaatooyin kala kulmaan helitaanka fursado dhaqaale, iyada oo ay 178 waddan soo saareen xeerar caqabad ku ah in ay haweenku si buuxda uga qaybgalaan fursadaha dhaqaalaha; halka ay 95 dal mushahar kala sarreeya ku bixiyaan shaqo isku mid ah, waxaana fursadaha shaqo ee haweenka xannibay 86 dal.[15]

15. "Assessment of Women's Economic Participation in Somalia" (March 2024); Mogadishu: National Economic Council of Somalia.

### Jaantuska 1: Horumarka Jinsiga ee Dalalka IGAD




*Tixraaca: Women's Economic Participation in Somalia (2024).*[16]

Xataa marka la eego heer gobol (Jaantuska 1), siddeedda waddan ee ku jira urur goboleedka IGAD ee Bariga Afrika, waxa ay Soomaaliya galaysaa kaalinta uga hoosaysa, iyada oo ah tan ugu liidata kaqaybgalka shaqada ee haweenka taniyo 2019kii.

Waxa Soomaaliya si daran u waxyeelleeyay, oo dabray masiibooyin dabiici ah, colaado, iyo barakac, kuwaas oo u horseeday in 54.4% ka mid ah dadweynaheedu ku noolaadaan xaalad ka hoosaysa xarriiqa saboolnimada, halka ay 20.9% kaga nool yihiin saboolnimo ba'an.

Waxsoosaarka Guud ee Gudaha Soomaaliya (GDP) kolkii saami isleeg loogu qaybiyay dadweynaha Soomaaliya sannadkii 2023, waxa qof kasta ku soo hagaagay $643.8.[17] Tan waxa uga sii daray qoqobka jinsiga iyo u dhammaansho la'aanta bulshada, itaal-darrada dowladda, iyo la'aanta shuruucda shaqada si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha, gaar ahaan haweenka. Maanta in dumarku ka shaqeeyaan meelo ka baxsan guryaha waxa loo arkaa in laga tagay dhaqankii Soomaalida ee soo jireenka ahaa, taas oo keentay dhibaatooyin badan oo ay ku jiraan faraxumayn, aflagaaddo, iyo xadgudubyo galmo ah oo ka dhaca goobaha shaqada iyo bulshada dhexdeeda. Dhibaatooyinkan waxa inta badan loogu cudurdaaraa jawaabo ku salaysan reergalbeedaynta bulshada Soomaaliyeed, iyada oo la aamminsan yahay in haweenku ku xad-gudbeen dhaqanka iyo caadooyinka bulshada Soomaaliyeed iyo shaqooyinka ragga ee ay ka midka yihiin shaqooyinka suuqa ee guriga ka baxsan.

16. National Economic Council (NEC) of Somalia. (2024). Assessment of Women's Economic Participation in Somalia. Mogadishu, Somalia. Pg. 8.
17. World Bank Data on Somalia (n.d.); World Bank Data on Somalia (n.d.); Available at: https://www.worldbank.org/en/search?q=Somalia

Taariikh ahaan, haweenkii Soomaaliyeed ee ka tirsanaa bulshooyinka reermiyiga iyo beeralayda ahi waxa ay door weyn ku lahaayeen ilaha waxsoosaarka dhaqaalaha, waxaanay ka shaqayn jireen hawlo ka baxsan guriga. Haddaba, magaalogalka ayaa horseeday in haweenka laga takooro dhaqaalaha, waxaana arrintan inoo soo waariday gumaystayaashii reer Yurub oo ay siyaasaddoodu ku dhisnayd in ay ragga shaqaalaysiiyaan. Tani waxay isbedeshay 1970-meeyadii iyadoo dawladdii Siyaad Barre ay doonaysay inay kordhiso ka qaybgalka haweenka ee dhammaan qaybaha dhaqaalaha. Sannadkii , ayaa kaqaybgalka haweenka ee waaxda dowliga kor loo qaaday oo la gaarsiiyay 10%, iyada oo 1980-naadkii haweenku kaqaybgaleen shaqooyin kala duwan oo aan ahayn kuwii dhaqan ahaan lagu yiqiin, sida qasacadaynta hilibka, kalluumaysiga, warshaddeynta sonkorta, iyo warshadda dharka.[18]

Dagaalkii sokeeyaha ayaa haween badan ku qasbay in ay masuuliyadda qoysaskooda qaadaan, kadibna waxa ay raadsadeen shaqo kasta oo ay heli karaan, taas oo si tartiibtartiib ah kor ugu qaadday matalaadda haweenku ku leeyihiin ilaha dhaqaalaha. Waaxda gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya waxa aad ugu badan ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah, halkaas oo ay haweenku yihiin kuwa ku gacansarreeya ganacsiyada yaryar.[19] Badanaa shirkadaha yaryar iyo ganacsiyada tafaariiqda iyo jumladda iibiya ee dalka oo dhan ku yaalla waxa iska leh dumar ama waxa ka shaqeeya dumar.[20] Tani waxa ay si weyn ula xiriirta dhibaatooyinka ay haweenku kala kulmaan helitaanka daymaha iyo maal-galintii ay uga baahnaayeen in ay ku ballaariyaan ganacsigooda. Waxa shirkadaha yaryar lagu gartaa hawlaha ganacsi ee ay hayaan, kuwaas oo aan lahayn dhaqaale "rasmi ah", ama dabeecad ahaan aad isbeddela, qiimo ahaan hooseeya, mana laha magacyo iyo shaqaale dheeraad ah".[21]

Ganacsiyadan yaryari waxa ay isugu jiraan kuwo gada xaabada, dhuxusha iyo cuntada qallalan, iyo sida oo kale khudaarta, qaadka iyo dharka huudheeyda. Waayadan danbe, haween kooban ayaa u dallacay waaxaha dhaqaalaha fiican sida xoolaha, kalluumaysiga iyo beeraha. Haweenka ayaa gabi ahaanba ka maqan mulkiilenimada iyo maalgashiga ganacsiyada dhaqaalaha fiican leh sida bangiyada iyo shirkadaha isgaarsiinta. Haweenka ka shaqeeya ganacsiyada noocan ah waxa lagu qiyaasaa 1%. Shirkadahan waxa ku badan muxaafidka iyo ragga dhaqanka ilaaliya, shaqada ugu badan ee ay haweenku ka qabtaanna waa nadaafadda.[22] Isla warbixinta UNDP waxa ay xustay in haweenka ka maqan goobta shaqada lagu macnayn karo hawlaha taranka, heerka waxbarashadooda oo hoosaysa, iyo qabiilka oo doorbida ragga shaqeeya.

---

18. Forni, Elisabetta (1980) "Women's Role in the Economic, Social and Political Development of Somalia" African Spectrum, Vol.15, No. 1, pp. 19-28.
19. "Gender Equality Strategy 2023-2026" (June 27 2023) United Nations Development Programme; Available at: https://www.undp.org/somalia/publications/undp-somalia-gender-equality-strategy-2023-2026
20. The Somalia National Development Plan 2020-2024 (January 5, 2020).
21. Gender Equality Strategy 2023-2026 (June 27, 2023).
22. Gender Equality Strategy 2023-2026 (June 27, 2023).

## Shaxda 1: Haweenka Dowladda u Shaqeeya

| Magaca | Sannadka | % Dumarka dowladda u Shaqeeya |
|---|---|---|
| Dolwadda Faderaalka | 2018 – 2021 | 37% |
| Dowladda Galmudug | 2020 – 2021 | 25% |
| Dowladda Hirshabeelle | 2021 | 4.5% |
| Dowladda Jubbaland | 2020 – 2021 | 3.8% |
| Dowladda Puntland | 2020 – 2021 | 28% |
| Dowladda Koonfurgalbeed | 2019 – 2020 | 15.5% |

*Tixraaca: Data taken from the National Civil Service Commission (November 2021).*[23]

Shaxda 1, waxaa ay isbarbardhigaysaa dumarka u shaqeeya dowlada federaalka iyo kuwa u shaqeeya dowlad-goboleedyada, iyada oo muujinaysa in uu farqi weyni u dhexeeyo haweenka ka shaqeeya heerarka dowladda. Dowladda Federaalka ayaa 37% ku hoggaaminaysa haweenka u shaqeeya dowladda, waxaana ku soo xigta Puntland oo ay ka yihiin 28%. Labada gobol ee ugu hooseeya waa Hirshabeelle oo ay shaqaalaha dowladda haweenku ka yihiin 4.5% iyo Jubbaland oo ay ka yihiin 3.8%.

Bangiga Adduunka[24] ayaa sannadkii 2023 haweenka dowladda u shaqeeya ku qiyaasay 31.2%, halka ay sannadkii 1991-da ka ahaayeen 33%.

Heerka shaqo la'aanta haweenka da'da yar iyo kooxaha nugul, ee ay ka midka yihiin barakacayaasha gudaha, iyo dadyowga reer miyiga ah, ayaa intaas ka sii badan, taas oo ay sababtay dhaqaalaha ku tiirsan waxsoosaarka soo jireenka ah sida xoolaha iyo beeraha oo ay raggu ku badan yihiin.[25] Warbixin uu 2022 soo saaray Xafiiska Tirakoobka Qaranku, oo ku salaysnaa ragga iyo haweenka Soomaaliya, ayaa lagu ogaaday in qoysaska deggan magaalada, miyiga iyo reer guuraagaba ay haweenku hoggaamiyaan ugu yaraan 30%.[26] Taas lidkeeda ah, daraasad ay samaysay Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha 2020, oo lagu sahamiyay in ka badan 10'000 oo haween ah oo kala joogay bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, ayaa 74.2% haweenkii ka qaybgalay daraasadda ahaayeen isha ugu weyn ee masruufta qoysaskooda, oo ay ku jiraan raggoodu. Haweenkan ayaa sidaa oo kale dhaqaale ahaan u taageeri jiray qaraabada iyo ehelada qoyska, kuwaas oo isugu jira dad waayeel ah iyo kuwo naafo ah, waxaanay noqdeen kuwo lafdhabar u ah daryeelka aasaasiga ah ee carruurta iyo qaraabada waayeelka ah, iyaga oo inta badan haya masuuliyado ay kali ku yihiin.[27]

23. Report on Women Promotion Covering the Benchmark, and the Entire Progress Achieved as per the NCSC Gender-Related Guidelines (November 2021); Prepared by the National Civil Service Commission.
24. World Bank Data on Somalia (n.d.).
25. The Somalia National Development Plan 2020-2024 (January 5, 2020).
26. "Women and Men in Somalia, Second Edition: (2023) Somalia National Bureau of Statistics, Mogadishu: Federal Government of Somalia.
27. "Somali Women Forging Alliances to Safeguard Equal Rights for All" (October 2020).

### Shaxda 2: Dhallinyaro aan haysan Waxbarasho, Shaqo iyo Tababarro Toonna

| Goobta Deggenaanshaha | Dumar | Rag |
|---|---|---|
| **Magaalo** | 46.3 | 24.2 |
| **Miyi** | 54.6 | 33.5 |
| **Reerguuraa** | 81.4 | 69.0 |

*Tixraac: Data taken from Women and Men in Somalia (2023).*[28]

Shaxda 2, waxaa ay muujinaysaa in dhallinyaro badan oo leh wiilal iyo gabdhaba, oo ku nool maagaalooyinka, miyiga iyo reerguuraaguba aanay helin waxbarasho, shaqo iyo tababarro toonna. Saddexdaas gooboodba dumarku way kaga badan yihiin ragga.

## 5. Isbeddellada Hadda Jira ee Haweenka ku Sugan Goobaha Shaqada

Dumarka oo ku yar jagooyinka hoggaaminta ayaan saamayn toos ah ku yeelatay shaqaalaysiinta iyo horumarinta haweenka ku sugan goobta shaqada. Sinnaan la'aanta jinsiga ayaa si weyn uga soo ifbaxday gabi ahaanba waaxaha shaqada iyo heerarka dowladda oo ay ku jiraan jagooyinka hoggaamintu. Aqalka Baarlamaanka ee hadda jira ee Dowladda Faderaalka Soomaaliya, waxa la doortay 2021, waxaanu ka kooban yahay 275 xubnood. Xubnahaas 275-ka ah, waxaa dumar ka ah 52 (19%) xildhibaan oo kali ah, kuwaas oo uu ku yimid hoos u dhac, marka la barbardhigo baarlamaankii tobnaad oo ay haaweenku ka ahayeen 24%.

Si kastaba ha ahaatee, waa markii ugu horreysay taariikhda Soomaaliya ee qof dumar ah, Sacdiya Yaasiin X. Samatar, loo doorto guddoomiye ku xigeenka 1-aad ee baarlamaanka.  Sannadkii 2021, waxa uu Aqalka Sare ka koobnaa 54 xubnood, oo ay14 (26%) haween ahaayeen, taas oo ah korukac markii loo eego tiradoodii 2016/17 oo ay ahaayeen 24%

Dhanka kale, dumarka ku jira Golaha Wasiirrada Faderaalka oo isugu jira wasiirro, iyo wasiiru-dowlayaal way ka yaryihiin baarlamaanka. Waxa uu golahani ka kooban yahay 75 xubnood, waxaana dumar ka ah todoba qof (9%) oo kali ah.

Matalaadda haweenka ee baarlamaanka dowlad-goboleedyadu way ka hoosaysaa tan dowladda faderaalka ah.

28. Women and Men in Somalia. (2023).

Puntland oo ah dowlad-goboleedda ugu da'da weyn dowladaha xubanaha ka ah faderaalka waxa ay leedahay 66 xubnood oo baarlamaan ah, waxaana ku jirta hal qof oo dumar ah (1%), waana dowlad-goboleedka ay ugu matalaadda yar yihiin haweenku, sababta oo ah oo gobolkani waxa uu ku liitaa abuuridda jawi-siyaasadeed oo ay haweenku kaga qaygbali karaan hoggaaminta dalka. Hirshabeelle waxa uu leeyahay 99 xubnood oo baarlamaan ah, oo ay ku jiraan lix (6%) haween ahi. Baarlamaanka Galmudugna waa 89 xubnood, oo ay ku jiraan siddeed (9%) haween ahi. Si kastaba ha ahaatee, guddoomiye ku xigeenka labaad ee baarlamaanka Galmudug waa gabar, Faadumo Cabdi Cali. Jubbaland waxa ay leedahay 75 xubnood oo baarlamaan ah, oo ay dumar yihiin siddeed (11%) xubnood. Baarlamaanka Koonfurgalbeed ayaa isna ka kooban 95 xubnood oo ay 20 (21%) haweeni ku jiraan, waana gobolka ay haweenku ku leeyihiin matalaadda baarlamaan ee ugu badan.

Marka goleyaasha wasiirada ee dowlad-goboleedyada la isku soo wada duubo, Puntland iyo Galmudug ayaa ugu sarreeya matalaadda dumarka, oo ah 10%, waxaana soo raaca Hirshabeelle oo ay haweenku ka yihiin boqolkiiba todoba iyo Koonfurgalbeed oo ay yihiin boqolkiiba shan. Waxaa ugu hoosaysa Jubbaland oo ay haweenku ka yihiin 4%.

Inta badan, waxa wasaaradaha dolwadda hoggaamiya rag, jogooyinka maamulkana iyaga uun baa haysta oo buux-dhaafiyay. Xataa Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqda Aadamaha ee Dowladda Faderaalka oo ah wasaaradda kaliya ee u dhaqdhaqaaqda xuquuqda haweenka iyo hablaha, ayaa dhowaan magaceeda loo beddelay Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqda Aadamaha, waxaana loo magacaabay wasiir cusub oo nin ah, kaas oo lagu magacaabo Bashiir Maxamed Jaamac (Bashiir Goobbe), kadib markii ay Khadiija Maxamed Diiriye, oo ahaa wasiirkii ka horreeyay dhimatay bishii Diisember 2023.

Doorka iyo jagooyinka ay haweenku ku leeyihiin hoggaanka dalka waxa inta badan qaata rag. Tusaale ahaan, wasiirad hore oo dowladda Faderaalka ka tirsanayd ayaa sheegtay in ay bahdileen wasiir-kuxigeenkeedii iyo agaasimaheedii guud oo rag ahaa, iyaga oo doonayay in ay tusaan in aanay u qalmin in ay wasiir u noqoto, waxaanay ka cabsi qabtay in xilka laga qaado oo nin lagu beddelo. Qaar ka mid ah kaqaybgalayaashii daraasaddan ayaa xusay in haweenka haya xilalka hoose iyo kuwa loo arko in aanay khatar ku ahayn xilalka ragga aysan la kulmin caqabadahaas oo kale.

Cilmibaaristan ayaa lagu ogaaday in ay dhibtan oo kale ku dhacdo haweenka kartida iyo hammiga sare leh, islamarkaana waxa haweenka noocan ah lagu waaniyaa in aanay muujin kartidooda si aanay raggu ugu arkin halis ku soo fool leh jagooyinkooda.

Tusaale ahaan, mid ka mid ah kaqaybgalayaasha cilmibaaristan ayaa sheegay in haddii uu guulaysto mashruuc ay gabari hoggaaminayso, dad badani ka soo horjeesanayaan, dhaleecaynayaan oo xataa ay takoorayaan. Haddii ay haweenku maalgelin u helaan mashaariicydooda, waxa ay ka shaqaalaysiiyaan ragga, haweenkana way iska indhatiryaan. Haweenkii la waraystay ayaa ka xumaa inta ay culays le'eg tahay shaqada ay qabtaan iyo sida aan loogu aqoonsanayn dadaalka iyo hawl-karnimadooda dheeriga ah. Waxa laga yaabaa in loo diro in ay qabtaan shaqooyin hoose oo aan u qalmin sida shaah karinta iyo shaqooyinka yar yar ee kale, taas oo ah hannaan kale oo muujinaya in si bareer ah haweenka loogu qasbayo in ay ka shaqeeyaan shaqooyinka hoose. Mid ka mid ah kaqaybgalayaashii Galkacayo ayaa xusay in aan ragga la weydiinin in ay shaqada qaban karaan, balse markasta lagu dhiirrigeliyo in ay qataan doorarka hoggaaminta, oo ay maamulaan haweenka."

Kaqaybgalayaal badan ayaa sheegay in dumarku inta badan shaqooyinka noocan ah ee hoose ku dareemaan sharaf-dhac, waayo waxa ay inta badan ka hoos shaqayeeyaan rag ay isku heer yihiin oo aqoon ahaan siman yihiin. Dumar badan oo ka cabsi qaba in ay shaqo la'aani ku dhacdo, ayaa dulqaad badan muujiya oo aan cabannin marka la waydiiyo in ay ka shaqaynayaan shaqooyin aan ku habboonayn oo aan xirfaddooda u qalmin. Waxa jiray dumar ka welwelsan in ka tagista shaqooyinkoodu sababi karto dhibaatooyin ku yimaadda qoysaskooda maadaama ay jeebkooda ku tiirsan yihiin, oo ay sidaas darteed wax walba u hurayaan in ay ilaashadaan shaqooyinkooda. Qaar kale ayaa aamminsanaa in shaqooyinka hoose iyo ismuujin la'aantu u suuragaliso in aan la hungurayn oo ay shaqooyinkooda sii haystaan. Dad badan oo lagu waraystay cilmibaaristan ayaa xusay in cabsidan iyo xishoodkani yihiin sababta ay dumar badani u raadin waayeen dallacsiin shaqo.

Caqabadaha saamaynta ku leh fursadaha shaqaalaynta haweenka waxa ka mid ah in ay dhaam heerarka aqoonta ku liitaan. Wiilashu aad bay uga badan yihiin gabdhaha marka loo eego ardayda iska diiwaangalisay dugsiyada sare ee heer gobol, waxaanay Jubbada Hoose iyo Bakool ba ka yihiin 35% iyo 7.2% sida ay u kala horreeyaan. Marka loo eego heer qaran, hablaha dugsiyada sare dhigtaa waxa itixaanka shahaadiga ah gala 38%, iyaga oo ku gudba heer u dhigma kuwa ay ku gudbaan wiilasha.[29]
Si kastaba ha ahaatee, waxa uu horumar ka muuqdaa dhanka isdiiwaangalinta jaamacadaha. Ururka Jaamacadaha Soomaaliya ayaa sheegay in ay xarumaha tacliinta sare heerka is diiwaangalinta habluhu inuu ahaa 35% sannadkii 2021-ka.


29. Somalia: Education Country Brief (January 2024); United Nations Education, Scientific, Cultural Organization (UNESCO); Available at: https://www.iicba.unesco.org/en/node/109

Da' kasta ha noqotee, ragga shaqeeyaa aad bay uga badan yihiin dumarka shaqeeya, gaar ahaan jiilasha u dhexeeya 30 illaa 50 jirka. Xitaa shaqooyinka soo jireenka ah ee ay haweenka badani ka shaqeeyaan, sida macallinnimada, rag baa u badan. Macallimiinta dhigta dugsiyada hoose/dhexe, ee Soomaaliya, waxa ay u badan yihiin rag, waxaanay haweenku ka yihiin 20%. Dumarka wax ka dhiga dugsiyada sare, aad bay u yar yihiin, waxaana ugu yar Hirshabeelle oo ay ka yihiin 2.4%, waxaana ugu badan Galmudug oo ay ka yihiin 4.9%.[30]

Sannadkii 1975-kii, haweenku waxa ay shaqaalaha dowladda ka ahaayeen 10%, iyaga oo sannadkii 2015 gaaray 26.6% ka hor intii aanu ku iman hoos u dhac gaarsiisan 19.8% sannadkii 2016, taas oo muujinaysa caqabadaha daba-dheeraaday ee ay haweenku kala kulmaan shaqo raadinta.[31]

Dumarka dowladda u shaqeeya ee ah nadiifisooyinka ayaa iminka aad u badan (32%), marka la barbardhigo kuwa leh xirfadda (7.96%) iyo tacliinta sare (27.96%). Sidaa oo kale, waxa jira farqi weyn oo u dhexeeya ragga iyo dumarka ka shaqeeya xafiisyada sarsare ee dalka, sida aqalka hoose ee baarlamaanka oo ay haweenku ka yihiin 19% halka aqalka sarena ka yihiin 26%. Si kastaba ahaatee Sacdiya Samatar, ayaa loo doortay guddoomiye kuxigeenka aqalka hoose ee baarlamaanka federaalka.[32] Sida oo kale, haweenku si weyn ugama dhex muuqdaan wasaaradaha federaalka, iyagoo golaha wasiirrada ka ah 9% kaliya.[33]

## Jaantuska 2: Xaddiga Cududda Shaqaalaha ee ku Salaysan Jinsiga




*Tixraaca: Women and Men in Somalia (2023).* [34]


30. Women and Men in Somalia (2023)
31. Forni (1980).
32. Affi, Ladan and Zainab Hassan (2022) "Women and Politics: Overcoming Barriers of Representation" Mogadishu: Heritage Institute for Policy Studies; Available at: https://heritageinstitute.org/women-politics-overcoming-barriers-of-political-representation-in-somalia/
33. Gender Equality Strategy 2023-2026 (June 27, 2023).
34. Women and Men in Somalia (2023).

Jaantuska 2-aad waxa uu muujinayaa xaddiga shaqaalaha Soomaaliya ee ku salaysan jinsiga da'doodu u dhexayso 15 jir iyo wixii ka weyn, kuwaas oo ku kala nool miyiga iyo magaalooyinka iyo weliba reer guuraaga oo gaar ah. Saddexdaas meeloodba dumarka shaqeeyaa way ka yar yihiin ragga shaqeeya.

Warbixin ay 2014 soo saartay UNDP oo ku salaysnayd haweenka ka shaqeeya waaxda gaarka loo leeyahay ayaa xustay in haweenku qiyaastii saddex meelood meel ka yihiin macmiisha xaruhama bangiyada iyo sidaa oo kalena 60% ka yihiin macaamiisha shirkadaha waaweyn ee isgaarsiinta, balse waxa adag in ay haweenku shaqaale noqdaan.[35]

Kordhinta cududda shaqaalaha haweenka waxa ay u baahan tahay waxqabad dowladeed oo firfircoon, taas oo lagu yaraynayo caqabadaha dhaqan-dhaqaale ee gaboobay iyo kuwo bulsho ee soo food saaray haweenka. Ganacsiga gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya oo ah mid kobcaya ayaa u muuqda in uu xal u noqon karo kordhinta cududda shaqaalaha haweenka, balse tani waxa ay u baahan tahay shuruuc iyo kaqaybgal dowladeed, oo ay ka mid yihiin in haweenka la siiyo tababarro kor loogu qaadayo xirfadaha iyo waxbarashada haweenka, iyo sida oo kale in sameeyo xeerar dhaqangal ah oo lagu ilaalinayo xuquuqda haweenka.

### Jaantuska 3: Haween ka Shaqeeya Qaar ka Mid ah Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay (%)




*Tixraaca: Productive Labor and Employment Creation for Somalia (2020).* [36]

35. "The Role of Somali Women in the Private Sector" (2014). Mogadishu: UNDP.
36. Uweis Abdulahi, Abdirisak Muhumed and Ayan Mohammed Abdullahi. (2020). Productive Labor and Employment Creation for Somalia: Key Challenges and Strategies. Heritage Institute for Policy Studies (HIPS) and City University, Mogadishu. Pg 15. Available at https://heritageinstitute.org/productive-labor-and-employment-creation-for-somalia-key-challenges-and-strategies/

Jaantuska 3-aad waxa uu muujinayaa cududda haweenka ka shaqeeya shan shirkadood oo gaar loo leeyahay kuwaas oo isugu jira bangiyo iyo shirkado isgaarsiineed oo la soo xushay. Bangiga IBS oo ay shaqaalihiisa 45% haween yihiin ayaa kaalinta kowaad ku jira, waxaana ku soo xiga Hormuud ICT oo ah 15%, Amal Bank oo ah 14%, Golis oo ah 12%, iyo Salaam Bank oo ah ka ugu hooseeya 10%.

# 6. Caqabadaha Haweenku Kala Kulmaan Goobaha Shaqada

Marka laga yimaaddo kala duwanaanshiyaha u dhaxeeya deegaanada Gaalkacyo, Garoowe iyo Muqdisho, oo ay ka mid yihiin tirada dadka, dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha iyo amniga, iyo kala duwanaanshaha da'da, waxbarashada, iyo waayo-aragnimada shaqo, badiba haweenkii ka mid noqday kooxihii lala yeeshay doodaha iyo waraysiyada gaarka ah, waxa ay la kulmeen caqabado isku mid ah. Waayo-aragnimada haweenka iyo sida loo gula dhaqmo goobaha shaqadu, waxa ay ku xidhan tahay arrimo kala duwan, sida da'deeda, heerkeeda waxbarasho, qabiilka ay ka soo jeeddo, in ay dal joog tahay ama qurbaha ka timi iyo bilicda muuqaalkeeda. Dumarka waaweyn, aqoon ahaan dhisan, qoysaska leh, kana soo jeeda qabiillada awoodda badan ee garabka iyo gaashaanka u ah, ayaa dhibaato yar la kulmay marka la barbardhigo dhibta ay la kulmaan dumarka da'da yar, aqoontoodu hoosayso, jir ahaanna aan ilqabatinka leh, isla markaana ka soo jeeda qabiillada aan awoodda badnayn.

Dumarkii ka qaybqaatay doodaha iyo waraysiyada gaar ah, ayaa lagu ogaaday heerarka kala duwan ee takoorka iyo habdhaqanka gabood-fallada ah, ee soo wajaha haweenku marka ay da'da yar yihiin. Tusaale ahaan, dugsiyada, wiilasha waxaa loola dhaqmaa sidii in ay ka caqli badan yihiin gabdhaha, in kasta oo ay gabdhaha da'da yari qaadaan masuuliyado qoys oo dheeraad ah, iyaga oo inta badan hooyooyinkood ka caawiya hawlaha guriga iyo daryeelka carruurta. Marka ay habluhu qaangaaraan, raggu waxa ay u arkaan kuwo u nugul ku danaysiga. Raggaas, waxa ka mid ah macallimiin u ballanqaadaya dhibco sare, iyaga oo beddelkeeda ka raba dano gaar ah oo ay ka fushadaan. Qaar badan oo ka mid ah dadka xog-ogaalka ah ayaa sida oo kale xusay, in ay hablaha dugsiyada sare dhigtaa yihiin bartilmaameed oo ay ugaarsadaan rag waaweyn oo maalqabeenno ahi. Xitaa qoyska dhexdiisa, "Haddii shaqo loo soo bandhigo inantiisa, aabbuhu wuu iska indhatiraa gabadha, waxaanu ka doorbidaa in loo shaqaalaysiiyo wiilka."[37]

37. Focus group discussion, Galkayo.

# 7. Caqabadaha Dhaqan iyo Bulsheed ee Ka Haysta Haweenka Goobaha Shaqada

Aragtiyaha taban ee ay raggu ka haystaan dumarka ayaa ku baahay goobaha shaqada. Qaar badan oo ka mid ah xog-bixiyayaasha ayaa carrabka ku dhuftay doorbiditaanka cad ee ragga lagu doorbidayo goobaha shaqada, iyada oo ay weheliso in la aamminsan yahay in ay haweenku guursadaan, oo ay guri joog noqdaan, halkii ay ka tagi lahaayeen goobaha shaqada. Tusaale ahaan, xubno ka tirsan kooxaha arrintan falanqeeyay ee Gaalkacyo, ayaa sheegay: "In haweenku joojiyaan qaadashada laabtoobyada, oo ay doorbidaan xanbaarista carruurta." Ragga ayaa sida oo kale loo arkaa shaqaale karti badan, oo khatarta u bareeri kara, waana taas sababta ay ragga u doorbidaan shirkadaha gaarka loo leeyahay. Xubnaha ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay waa la xaqiraa, dumarkooduna waxa ay la kulmaan takoor dheeraad ah.

Aamminsanaanta bulshada ee ka tarjumaysa muhiimadda ay qabaa'ilku u leeyihiin bulshada Soomaaliyeed ayaa ka muuqata heshiiska awood-qaybsiga ee 4.5, iyada oo xilalka dowladda lagu qaybsado hab qabiil, halkii lagu saleyn lahaa karti iyo hufnaan shaqo. Tani waxa ay faa'iido iyo sedbursiimo u tahay ragga, maadaama aanay wax su'aal ahi ka taagnayn reernimadooda iyo sida ay daacadda ugu yihiin qabiilkooda. Haweenka u dhaxa qabiil ka baxsan qabiilkooda ayaa inta badan loo arkaa in ay ka faa'iidaysanayaan qabiillada ay u dhaxaan ee ay ka soo jeedaan raggooda iyo ubadkeedu, sidaas darteed qabiillada ay ka dhashaan lama rabaan in ay ku fadhiistaan kuraasta loo qoondeeyay reerkooda. Kooxda Muqdisho waxa ay xustay: "In haweenka ka soo jeeda beelaha leh siyaasiyiinta awoodda leh, inta badan heli karaan faa'iidooyin dadban oo ay ka mid yihiin: in aan la faduulin iyo in ay shaqadooda u gutaan si bilaa carqalad ah.

# 8. Xayeysiisyada Shaqada

Waaxaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay waa ay ku kala duwan yihiin shaacinta shaqada, laakiin siyaabaha qaar ayay hannaanadoodu isu shabbahaan, marka loo eego caqabadaha ay haweenku kala kulmaan shaqo raadinta. Ragga iyo dumarka si kala duwan ayaa loola dhaqmaa marka ay shaqo soo codsadaan. Ka hor inta aan la eegin shahaadooyinkooda waxbarasho iyo waaya-aragnimadooda shaqo, haweenka waxaa lagu qiimeeyaa da'dooda, muuqaalkooda, iyo sida ay uga go'an tahay in ay shaqo helaan. Tani waxa ay keentaa in ay raggu ugaadhsadaan dumarka, iyaga oo shaqaalaysiintooda iyo sii joogistooda shaqadaba ku xiraya in ay ku beddeshaan fulinta damaca ay raggu ka rabaan. Qaar badan oo ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa sheegay in haweenka qaybahooda kala duwan, laga soo bilaabo xubnaha baarlammaanka iyo kuwa qabanaya shaqooyinka kale ee maamulka ay u baahan yihiin rag u dooda, oo awood ku meel mariya codsigooda. Dumarka iyo raggu, waxa kale oo ay isticmaalaan habab kala duwan marka ay timaaddo habka codsiga shaqada.

Gabadh dowladda u shaqaysa oo madax ah ayaa tiri: "Raggu marka ay shaqo ka dalbanayaan hay'adaha dawladda, waa wax iska caadi ah in la arko iyaga oo abaabulaya dad aad u tiro badan, oo ay ku jiraan xildhibaanadooda, dad la xoojiya iyo saaxiibadood; xitaa waxaa suurtogal ah in ay taageeraan dad ka tirsan hay'adda uu codsiga u gudbinayo ninku. Taas lidkeeda, ma jiraan dumar badan oo shaqooyinka soo codsada, kuwa soo codsadaana waxa ay soo diraan CV-yadooda, waxa ayna sugaan inta loogu yeerayo wareysiga shaqada. Boqolkii codsi shaqo ee rag leeyahay, waxaa weheliya shan ilaa 10 codsi shaqo dumar leeyahay keliya. Si liiska wareysiga loo xulay ugu eekaado mid caddaalad ah, hal qof oo dumar ah ayaa lagu daraa si loogu qurxiyo."

Mid ka mid ah siyaabaha yar ee ay haweenku u helaan fursad caddaalad ah in lagu shaqaaleysiiyo ayaa ah marka beesha caalamku ay maalgeliso jagada shaqada loo tartamayo, oo ay ku jiraan shuruudo qoondo u xidhaya haweenka. Tusaale ahaan, sarkaal sare oo ka tirsan dawladda ayaa sheegay: "In haddii uu Bangiga Adduunku shaqaale u doonayo shan jago - iskuduwe, madaxa-iibka, qof maaliyadda ah, qof ku takhasusay badbaadada bulshada, iyo jinsiga – waxa haweenka la siiyaa oo kaliya booska jinsiga, halka afarta boos ee kale ay helaan raggu."

Marka ay timaaddo cidda la shaqaaleysiinayo, xayeysiisyo badan oo shaqo ayaa dhiirrigeliya in ay haweenku soo codsadaan shaqada, haddana waxaa iska cad in ragga la doorbido. Shaqaalaha ragga ah waxaa loo arkaa in ay yihiin shaqaale hufnaan iyo kartiba leh. Sidaa oo kale, waxaa loo arkaa in ay raggu mushaarkooda ku daryeelayaan qoysaskooda. Dhinaca kale, haweenka ayaa la rumeysan yahay in mushaarkoodu ku baxo naftooda, dharkooda iyo is qurxintooda.

Xaaladaha qaarkood, ka qaybgalayaasha doodda ee Gaalkacyo ayaa xusay, in haween badan ay iskood isu xilqaameen, si ay khibrad iyo waayo-aragnimo shaqo tababbar ah uga helaan goobaha shaqada, balse marka ay fursado soo baxaan ee dhaqaale la helo haweenka la iska indhatiro, maamulayaashuna ay door bidaan in ay shaqaaleysiiyaan rag. Sidaa oo kale, ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha waxa leh oo maamula rag, fursadaha haweenka ee shaqaaleysiintuna aad baa ay uga yar tahay ta ragga. Tusaale ahaan, warbixintii UNDP ee 2014 ee haweenka ka shaqeeya ganacsiga gaarka loo leeyahay, ayaa lagu xusay in haweenku ka maqan yihiin waaxaha bangiyada iyo isgaadhsiinta.

Dadka xog-ogaalka ahi waxa ay xuseen in raggu ganacsiga ay aad ugu guulaystaan, sababta oo ah waa ay is caawiyaan. Qaar badan oo ka mid ah dadkii la wareystay ayaa si isdaba joog ah u iftiimiyay, in dhibaatada halista ah ee soo food saartay haweenka goobaha shaqada iyo ganacsiyada lihi ay tahay, in aanay haweenku is-indhabuuxin ama in aanay ku fiicnayn iskaashiga iyo is caawinta dhexdooda. Sida laga soo xigtay qof xog-ogaal ah oo ka shaqeeya xarumaha samafalka ayaa yiri, "Soomaaliya, shaqaalaha waxa maamula ragga, ragguna way is caawiyaan. Tusaale ahaan, haddii ay alaab soo raranayaan, waa ay soo wada rartaan, kharashaadkana waa ay qaybsadaan, laakiin ma dhacdo in dumarku ay sidaas oo kale sameeyaan."

Go'aannada ku saabsan shaqaaleysiinta, dallacsiinta, iyo arrimaha kale ee la xiriira shaqada, ayaa inta badan lagu jaangooyaa meelo shaqada ka baxsan iyo shirarka aan rasmiga ahayn oo ay haweenku ka maqan yihiin. Taas macneheedu waxa weeye, in xataa marka dumarka la shaqaaleysiiyo, aanay inta badan gaarsiisnayn heer maamul, oo ay ka maqan yihiin jagooyinka mushaarka badan lagu qaato. Marka dumarku si caddaalad ah ugu tartamaan shaqooyinka, ee la shaqaaleysiiyo, waxa loo sheegaa in ay ku fadhiyaan kuraastii ragga. Mid ka mid ah dadka xog-ogaalka ah, oo ka shaqayn jirtay hay'adaha samafalka ayaa tiri, "Mar aan shaqo ka dalbaday Bisha Cas, oo aan galay kaalinta koowaad, qofka labaad ee igu xigaana ay gabadh kale ahayd, waxaa na loo sheegay in tani ahayd shaqo nin, waxaana lagu yiri "labadiinan dumar ahi aad ayaadu nasiib badan tihiin, sababta oo ah waxa aad hesheen shaqooyinka ragga."

Haweenka ku jira kooxaha falanqaynta iyo wareysiyada gaar ah lala yeeshay, ayaa dhamaantood xusay, "In shaqaalaysiinta haweenka aan la siinin mudnaan gaar ah, sababta oo ah ragga waxaa loo tixgeliyey in ay qaadayaan mas'uuliyadda dhaqaale ee qoysaskooda, sidaas darteedna ay u baahan yihiin in ay shaqeeyaan; halka haweenka loo arko in ay u isticmaalayaan mushaaarka iyo dakhliga soo gala baahidooda shakhsiga ah." Tani waxa ay ahayd wax lala yaabo, marka loo eego haweenka tirada badan ee gacanta ku haya masaariifta guryaha ay maamulaan, iyaga oo ka shaqeeya meel ka baxsan guriga.

Gabar waxbarasho jaamacadeed oo sare haysata, oo dowladda u shaqaysa ayaa tiri "haweenka dhibaatooyinka ugu badan kala kulma goobaha shaqada waa dumarka ka aqoonta badan, ka xirfadda badan, ka hammiga weyn, kana firfircoon ragga. Haweenka da'doodu u dhaxayso 40 iyo 50 ee aqoonta sare leh, qurbaha ka yimi, ee iskood isu taagi kara ayaa loo arkaa in ay yihiin dhibaato hor leh, "ama xittaa kuwo u ololeeya dumarnimada".

## 9. Dallacsiinta

Waaxaha dawladda, ragga ayaa ka badan dumarka dhanka dallacsiinta. Mid ka mid ah dadka xog ogaalka ah oo Garowe ku sugan ayaa yiri, "Waxa aad la kulmi doontaan haween sannado badan ka shaqeynayey shaqada dowladda, oo aan xitaa hal mar la dallacsiin". Arrintan ayaa qayb ka ah in xilalka qaar ay yihiin kuwo siyaasiyiin u wada xiran, oo haddii ay wasiirka, wasiir-ku-xigeenka iyo agaasimayaashu rag wada yihiin, waxa ay magacaabaan rag intooda badani ka tirsanayn hay'adahooda, taasi oo xaddideysa fursadaha ay haweenku u helayaan horumarka iyo dallacaadda.

Rag badan ayaa la dalacsiiyaa, sababta oo ah habeenkii marka ay ku kulmaan meelo shaqada ka baxsan ayay isla afgartaan, kadibna go'aanno wada gaadhaan. Dumarka waa laga tagaa, haddii aanu nin kale u gorgortamaynin, oo u doodaynin. Tacabka haweenka laga ma markhaati kaco, laakiin khaladaadkooda ayaa inta badan farta lagu godaa. "Haweenka waxaa loo arkaa shaqaale aan la isku halleyn karin, sababta oo ah sida ay u joogto ayaa la guursanayaa, oo ay shaqadaba joojinayaan. Haddii ay shaqada sii joogaanna, waxa ay qaadan doonaan fasax dheer oo dhalmo ah," ayuu yidhi mid ka mid ah dadka la waraystay. Heerka xaddiga dhalashada Soomaaliya, waxa lagu qiyaasaa haweenaydiiba in ay dhasho 6.4 carruur ah.[38] Ragga ayaa ka badan dumarka fasax qaata, tusaale ahaan sababo waxbarasho awgeed, laakiin tan iyaga looma xisaabiyo.

# 10. Siyaasadaha iyo Sharciyada Lagu Maamulayo Xuquuqda Shaqaalaha

Dagaalladii sokeeye ee daba-dheeraaday ee Soomaaliya ka dhacay, waxa ay abuureen baahi degdeg ah oo lagu cusboonaysiinayo shuruucdii hore ee la dajiyay ka hor 1991, xilligaas oo haweenku heleen fursado wanaagsan oo aan la takoorin. Waxa kale oo jirta, baahi weyn oo loo qabo in si weyn loo wacyigeliyo, oo si hufan loo fuliyo shuruucda iyo xeerarka jira, sida qaar badan oo ka mid ah ka qaybgalayaashu ay ku taliyeen. Mid ka mid ah sharciyadii ugu dambeeyay ee ka hadlayay xuquuqda shaqaalaha, waa sharcigii 2006, ee shaqaalaha rayidka ah. Sharcigaasina waxa uu dhaqangalay iyada oo dib loo dhisayo dawladdii Soomaaliya, lagamana hadlin xuquuqda shaqaalaha ka hawlgala ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo tan haweenka midna.

Bishii Ogosto 2023-kii, ayay Golaha Wasiirrada Soomaaliya ansixiyeen xeerka qabyo-qoraalka cusub ee shaqaalaha (qormada 3aad), kaas oo loogu talagalay in lagu beddelo sharcigii 65-aad, ee 1975. Sharcigan cusub ee shaqaalaha ayaa raacaya axdiga Ururka Caalamiga ah ee Shaqaalaha (ILO) ee 190-aad iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah ee ay Soomaaliya saxiixday, waxa uuna ka hadlayaa arrimaha la xidhiidha shaqada: macaamilka, mushaarka, gunnada iyo hababka loo xallinayo khilaafka shaqada. Waxa kale oo uu wax ka qabanayaa xadgudubyada jinsi iyo gabood-fallada goobaha shaqada ka dhaca. Sharcigan qabyada ah oo horyaalla baarlamaanka federaalka, ayaa hadda laga sugayaa in ay qalinka ku duugaan, oo ay ansixiyaan.[39]

Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya 2012 (qodobkiisa 3aad, faqraddiisa 5aad), waxa uu dhigayaa in haweenka lagu daro dhammaan hay'adaha dowladda; in kasta oo ay haweenku weli aad ugu yar yihiin dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyadaba.

---

38. World Bank Data on Somalia (n.d.).
39. "Approval of the Draft Labour Code for Somalia by the Council of Ministers" (2 August 2023) Federation of Somali Trade Unions (FESTU); Available at: https://www.festu.org/approval-of-the-draft-labour-code-for-somalia-by-the-council-of-ministers/

Intaa waxaa dheer, qodobka 24aad (faqraddiisa 5aad) ee dastuurku waxa uu dhigayaa in, "dhammaan shaqaalaha, gaar ahaanna haweenku ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubka jinsiyeed, faquuqa iyo takoorka goobta shaqada. Sharci kasta oo shaqada iyo habdhaqanka la xidhiidhaa, waa in uu u hoggaansamaa sinnaanta jinsiga ee goobta shaqada." [40]

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqal Insaanka, ayaa sannadka 2019-kii, soo diyaarisay Axdiga Haweenka Soomaaliyeed oo ku baaqaya in la soo afjaro goldaloolooyinkii ka jiray dhanka shaqada iyo qoondada haweenka ee 50% ah, ee saddexda waaxood ee dowladda iyo dhammaan guddiyada.[41] Hase yeeshee, sida qaar badan oo ka mid ah xog-bixiyayaashu ay xuseen, sharciyada ka soo horjeeda takoorka iyo dhibaatada jinsi lama hirgeliyo, run ahaantiina lama siiyo door wax-ku-ool ah.

Marka la eego heerka maamul goboleedyada, dastuurka Puntland 2019, waxa uu dammaanad qaaday in haweenku ay helaan mushahar la mid ah ka ragga, oo ay u shaqeeyaan si siman, sida oo kale na ay helaan xuquuqda fasaxa umusha (waxa sidaas dhigaya qodobka 37aad: faqraddiisa 3aad & 4aad). Dastuurku waxa kale oo uu dammaanad qaadayaa, qodobka 128aad (faqraddiisa 2aad), in shaqaalaha dawladda lagu shaqaaleysiiyo aqoontooda iyo kartidooda.[42] Puntland ayaa weli ah, dowlad-goboleedka keliya ee meel mariyay sharciga dambiyada galmada la xidhiidha ee 2016, kaas oo sida oo kale mamnuucaya faraxumaynta.[43] Sida oo kale, Dastuurka Galmudug ee 2015, qodobkiisa 13aad ayaa shaqaalaha oo dhan siinaya xuquuq isku mid ah, halka qodobka D, uu si gaar ah u ilaalinayo xuquuqda iyo sharafta haweenka.[44]

Puntland ayaa sida oo kale meel marisay sharciga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay, kaas oo dhigaya in shaqaalaha labka iyo dheddigga ah, ee qabta shaqo isku mid ah ay helaan mushahar isku mid ah. Isla sharcigan ayaa dhigaya in haweenku ay xaq u leeyihiin 16 toddobaad oo fasax dhalmo ah iyo fasax nasasho. Sharcigu, waxa kale oo uu tilmaamayaa in Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Puntland ay masuul ka tahay maamulidda hawlaha la xiriira shaqada iyo shaqaalaha.[45]

Marka la eego heer caalami, Soomaaliya waxa ay ansixisay xeerka Ururka Caalamiga ah ee Shaqaalaha (ILO), ee ku saabsan ka hortagga gabood-fallada iyo dhibaataynta shaqaalaha 2019 (No.190), kaas oo dhaqan galay Maarso 8, 2021.[46] Sharcigani waxa uu khuseeyaa shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dawliga ah. Si gaar ah, waxa uu dammaanad qaadayaa ka ilaalinta shaqaalaha - oo ay ku jiraan kuwa shaqo-carbiska ah, shaqadoonka, - dhammaan noocyada gabood-fallada iyo dhibaataynta, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira jinsigu.

40. The Federal Republic of Somalia, Provisional Constitution (August 1, 2012); Available at: https://www.constituteproject.org/constitution/Somalia_2012
41. "Somali Women's Charter" (2019). Ministry of Women and Human Rights Development; Mogadishu: Federal Government of Somalia. Available at: https://www.mwhrd.gov.so/en/wp-content/uploads/2019/11/Somali-Womens-Charter-MoWHRD-April-8-2019-1.pdf
42. Constitution of the Puntland State of Somalia (December 2009); Available at: https://www.ecolex.org/details/legislation/constitution-of-the-puntland-state-of-somalia-lex-faoc197962/
43. "Puntland Passes Law Against Sexual Offences" (5 September 2016); Available at: https://somalia.unfpa.org/en/news/puntland-passes-law-against-sexual-offences
44. Dastuurka KMG ee Dowlad Gobaleedka Galmudug Soomaaliya (July 28, 2015); Available at: https://galmudugoag.so/constitution-of-gss/
45. Private Sector Employee Law (Labor Code No. 65) (2011); Puntland State of Somalia
46. C190 – Violence and Harassment Convention No.190 (2019); Available at: https://normlex.ilo.org/dyn/normlex/en/f?p=NORMLEXPUB:12100:0::NO::P12100_ILO_CODE:C190

Axdigu waxa uu saxiixayaasha ugu baaqayaa, in ay dhaqangeliyaan shuruuc heer qaran ah, oo: "loo dhan yahay, midaysan, oo leh hannaan ka jawaabaya tacaddiyada jinsiga, oo loogu talagalay ka hortagga iyo ciribtirka gabood-fallada iyo dhibaatooyinka ka dhaca goobaha shaqada ee adduunka".

Waxaa jira laba sharci oo ay Soomaaliya u baahan tahay in ay qaadato, si loo ilaaliyo xuquuqda haweenka, oo ay ku jiraan xaqa ay u leeyihiin in ay ku noolaadaan nolol bilaa faquuq iyo dhibaatayn ah. Sannadkii 2015-kii, waxa ay dowladda Soomaaliya oo ay hormuud u ahayd Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqal Insaanku bilowday tababarro aqooneed oo lagu baranayo dhaqangelinta iyo ansixinta Axdiga Qaramada Midoobay ee la xiriira Ciribtirka Takoorka ka dhanka ah Haweenka (CEDAW). Axdigani waxa uu xoojin doonaa xuquuqda haweenka iyo hablaha, isaga oo yaraynaya saamaynta takoorka ku dhisan dhaqamada kala jeclaysiga ah ee jinsiga iyo qabiilka la xiriira, iyada oo la hubinayo in ay heleen xaquuq isku mid ah oo sharciga waafaqsan.[47]

Sharci kale oo muddo soo jiitamayay ayaa ka hadlaya xadgudubyada galmada ee ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha. Hindise sharciyeedka dambiyada galmada ayay golaha wasiiradu meelmariyeen 30 May, 2018. Hase yeeshee, waxa uu iska caabin kala kulmay baarlamaanka federaalka, waxaana ka laabatay wasiirkii hore ee haweenka iyo xuquuqal insaanka, Xaniifa Maxamed. Si kastaba ha ahaatee, wasiirkii cusbaa, Khadiija Maxamed Diiriye, oo kaashanaysay haween ka tirsanaa bulshada rayidka ah iyo haweenka aqoonta diimeed leh ayaa hawlgelisay rag culimo ah. Guddi ka kooban rag iyo dumar culimo ah ayaa sharcigan dibu-eegis ku sameeyay, si waafaqsan shareecada Islaamka, waxaanay u bixiyeen xeerka dambiyada kufsiga iyo dhaqan xumada. Khadiija, oo si lama filaan ah u geeriyootay dabayaaqadii 2023-kii, ayaa mar kale u gudbisay Golaha Wasiirrada, waxaana la gudbiyay 28, Diiseenbar. 2023-kii, dhimashadeeda ka dib. Hadda waxaa la sugayaa in baarlamaanka federaalku ansixiyaan, oo la meelmariyo.[48]

## 11. Maqnaanta Adeegyada Daryeelka Dumarka

Si guud, waxa ay kaqaybgalayaashu ka sinnaayeen inay u arkayeen in jawiga shaqadu aanu sida badan soo dhawayanyn haweenka, sidoo kalena uu ahaan karo mid ay kala kulmaan faquuq, xero-kasaar iyo tacaddi loo geysto. Sida mid ka mid ah dadka la waraystay uu xusay, kaabayaasha shaqadu (ha ahaadeen kuwo dawli ah ama kuwo gaar loo leeyahay) ma aha kuwo soo dhawaynaya haweenka aan inta badan haysan meel habboon oo ay ka shaqeeyaan.

47. "Somalia Moving Towards Ratifying CEDAW" (22 August 2015); UNFPA Somalia
Available at: https://somalia.unfpa.org/en/news/somalia-moving-towards-ratifying-cedaw
48. Abdullahi, Abdiqani (December 29, 2023) "Somali Cabinet Approves Bills on Sexual Offences and Minimum Working Age" Somali National News Agency (SONNA); Available at: https://sonna.so/en/somali-cabinet-approves-bills-on-sexual-offences-and-minimum-working-age/

Qaar badan oo ka mid ah xog-bixiyayaasha ayaa xusay in ay farqiyo laxaad lihi ka dhex jiraan bii'adaha lagu shaqeeyo, kuwaas oo u dhexeeya qaybaha gaarka loo leeyahay, kuwa aan faa'iido-doonka ahayn iyo hay'adaha dawliga ahba. Taas oo jeedinaysa in ay jiraan dhibaatooyin badan oo lagala kulmo ganacsiyada gaarka loo leeyahay; sida haweenka ay shaqaalaysiiyaan oo yar.

Kaqayb-galayaal badan ayaa rumaysan in ay haweenku yihiin "hawlkar, saacado dheeraad ah shaqada ku jira, laakiin aan loo aqoonsan oo aan wax gunno ah lagu siinnin shaqadooda dheeraadka ah, gaar ahaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay". Qaybtan ayaan sidoo kale lahayn xeerar, waxaana aad u yaraaday ilaalinta xuquuqda haweenka. Tusaale ahaan, dadkii la waraystay ayaa waxa ay tilmaameen in "shirkadaha xawaaladaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay aan dhaqan ahaan loo tixgelin in ay yihiin goobo ku habboon dumarka. Marka laga tago dumarka, ragga ayaa waxa ay si khaldan u soo daliishadaan xadiis (laga weriyay nebi Muxammed NNKH) oo ay ku diidayaan joogitaanka dumarka ee goobaha shaqada iyo in ay caddayn uga dhigaan iyaga oo haweenka u sheegaya in ay guryahooda ku negaadaan."

Haddii gabar laga shaqaalaysiiyo shirkad gaar loo leeyahay, waxa ay gelin karaan jawi shaqo oo col ku ah, kaas oo ku dirqin kara in ay shaqada ka tagto. Tusaale, "haweenay ayaa laga shaqaalaysiinayaa waax ay keligeed gabadh ka tahay, waxaana la geynayaa xafiis ay rag ka buuxaan oo ay kala kulmi karto cabsi iyo baqagelin."[49] Si ay nafahooda u ilaashadaan shaqadoodana u adkaystaan, haweenku badanaa waxa ay u lebbistaan si waayeelnimo ah, oo uu ku jiro niqaab (indhashareer), si aanay u soo jiidan saaxiibbadooda shaqada iyo macaamiisha toona.

Hay'adaha aan faa'iido-doonka ahayn, ee ay ku jiraan ururrada dawladuhu wdaagaan, sida qarammada midoobay iyo ururrada aan dawliga ahayn (NGOs), ayaa loo tixgeliyay meesha ugu fiican ee ay haweenku ka shaqeeyaan. Kuwaas oo ay ka jiraan siyaasado qeexan oo lagu maamulayo masuuliyadda iyo xuquuqaha shaqaalaha, haweenkuna ay u arkeen in ay ka ilaalinayaan tacaddiyada goobta shaqo. Taa beddelkeeda, ka shaqaynta hay'adaha dawliga ah ayaa loo arkay in ay sahlan tahay, xagga wakhtigana yar tahay, taas oo ay haweenay ku sheegtay 'shaqo aan buuxin". Laakiin heshiiska awood-qaybsiga ee 4.5 ee jagooyinka lagu qaybsado hannaan qabiil ayaa caqabad weyn ku ah in dumarka laga shaqaalaysiiyo dawladda.

Aragtidan waxa taageeray xog ka soo baxday dawladda, taas oo muujinaysa in laga soo bilaabo 2018-kii ilaa 2021-kii, ay haweenku shaqaalaha dawladda ka ahaayeen 37%, inta badanna ay ka shaqeeyaan jagooyin hoose, sida gacanyare iyo nadaafadda.

49. Galkayo focus group.

Sida lagu sheegay warbixin ay soo diyaariyeen guddiga qaran ee shaqaalaha dawladdu (NCSC), 75-ka agaasime laba ka mid ah ayaa haween ah (3%), sidoo kale 363-ka agaasime-waaxeed dumarku waxa ay hayaan keliya 44 jago (14%). Sidoo kale shaqooyinka shaqaalaha xirfadda leh iyo diblumaasiyiinta ayaa ay ka yihiin 16%. Qaybta keliya ee ay dumarku kaga badan yihiin ragga ayaa ah shaqooyinka nadaafadda, taas oo ay 97% ka mid ah shaqaalaha nadaafaddu yihiin haween.[50] Ka-maqnaanshahan dumarka ee xilalka sare ayaa noqonaya mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ay caddeeyeen xog-bixiyayaashu, kuwaas oo sheegay in ay inta badan go'aammada raggu u gaadhaan si aan caadi ahayn, iyada oo marar badanna aan sharciga la raacin. Waxa sidoo kale ka mid ah caqabadaha ay xuseen xog-bixiyayaashu, la'aanta goobo ay ku cibaadaystaan haweenku oo ka jirta shirkadaha oo dhan, taas oo ah dhibaato saamayn ku yeelatay awoodda shaqo ee haweenka si ay isugu dheellitiraan baahidooda ah in ay shaqeeyaan iyaga oo gudanaya waajibkooda diimeed. Dood ka dhacday dhinaca khadka bishii Maaraj 2023-kii, oo uu soo qabanqaabiyay Dhaqdhaqaaqa Sinnaanta Jinsiga Soomaaliyeed (SGEM) ayaa lagu ogaaday in haweenka muqdisho iyo guud ahaan kuwa dalku aanay haysan goobo cibaado oo ay ku gutaan salaadahooda maalinlaha ah, marka ay ka maqan yihiin guryahooda.[51]

Gabadh ka shaqaysa shirkad gaar loo leeyahay ayaa sheegtay in haweenka lagu dirqiyo in ay ku tukadaan meelo aan ku habboonayn, meelo cidhiidhi ah iyo goobaha dadweyanaha, sida jaranjarooyinka hoostooda. Xitaa marka ay haweenku ka qaybgalayaan shirarka la xiriira shaqada ama kulammada ka dhaca hudheellada waaweyn ee Muqdisho, badanaa haweenku waxa ay codsadaan goobo ay ku tukadaan, sababtoo ah ragga oo qudha ayaa goobo tukasho loo diyaariyay. Markaa haweenku waxa ay ku khasban yhiin in ay ku tukadaan qolal gaar ah ama xafiisyada. Dhibaatada kale ee soo wajahda haweenka shaqeeya ayaa ah in aanay ku haysan qolal nasasho oo u gaar ah nadiifna ah, hadday ahaan lahaayeen hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeahay. Layaab ma laha, xitaa haweenka ka shaqeeya hoggaaminta, sida aqalka hoose ee baarlamanka federaaku ma haystaan musqulo. Sidoo kale hooyooyinka umusha ah lama tix-galiyo, maadaama aanay shaqada ka jirin qolal umulaha. Sharci ahaan, haweenka nuujinaya waa in la siiyo saacado dheeraad ah oo ay shaqada ka baxaan maalin walba, si ay guryahooda u tagaan.

Haweenku waxa ay shaqada kala kulmaan tacaddiyo kala duwan. Dumarka da'da yar, kuwa aan guursan iyo kuwa loo arko in ay qurux badan yihiin ama ay ka soo jeedaan qabiillada laga tirada badan yahay, ayaa waxa ay si gaar ah ugu nugul yihiin tacaddiga galmada. Xadgudubka la xidhiidha jinsiga iyo galmada ayaa isa soo tarayay, isaga oo labanlaabmay 2019-2020.

50. Report on Women Promotion Covering the Benchmark, and the Entire Progress Achieved as per the NCSC Gender-Related Guidelines (November 2021); Prepared by the National Civil Service Commission.
51. "Women and Islam: Exclusion of Women from Places of Worship & Its Consequences" (March 22, 2023); Twitter Space, Somali Gender Equity Movement (SGEM).

Dhibaatooyinkan ayaa waxa horseeday khilaafyada, sinnaan-la'aanta jinsiyeed, qulqulatooyinka bani'aadantinnimo ee dabada dheeraaday iyo colaadaha qabiil ee aan dhammaadka lahayn, taas oo sababtay in aan lala xisaabtamin dembiilayaasha. Tani waxa ay muujinaysaa baahida loo qabo jawaab degdeg ah iyo abuurista hannaan sharci oo ilaaliya xuquuqaha haweenka iyo hablaha Soomaaliyeed.

Shaqaale ka hawlgala hay'ad dawli ah ayaa xusay in "dumarka ka soo jeeda qabiillada awoodda badan ama kuwa ay cid qabiilkooda ahi jago sare ka hayso dawladda ay si dadban u heli karaan ilaalo." Dumarka ka weyn da'da 30 ee leh khibradda shaqo iyagu badanaa waa ay difaaci karaan naftooda, laakiin kuwo badan ayaa ka cabsanaya in ay waayaan shaqadooda haddii ay ka cawdaan tacaddiyada. Haweenka ka shaqeeya ururrada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah iyo ururrada caalamiga ahba, sida qarammada midoobay ayaa haysta difaaca ugu badan maadaama ay ka jiraan xeerar qeexan oo arrimahan ku saabsan. Marka la joogo hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay labadaba[52] "waxa dhici karta in aanu qofna la kulmin wax cawaaqib ah oo ku kasbaday  xadgudub galmo." Haweenka ayaa sidoo kale laga yaabaa in laga niyadjebiyo in ay soo sheegtaan wax tacaddi ah oo geystey sababo la xiriira walaacyo gaar ah. Waxa ay ka werweraan in ay waxyeellayso sumcaddooda gaarka ah ama midda shaqada. Haddii ay tacaddiyadu soo shaacbaxaan, waxa jira iskudayo lagu aamusiinayo oo gabadha lagu ceebaynayo dhagarqabahana lagu difaacayo. Gabadha, qoyskeeda iyo qabiilka ay ka dhalatayba inta badan waa la ceebeeyaa oo la sumcad-dilaa.

Haweenku waxa ay adeegsadaan tabo kala duwan si ay u ilaaliyaan naftooda. Tusaale ahaan, waa iska caadi in gabadh aad u da'yari ay guursato nin da'weyn oo jago sare kan haya meesha ay ka shaqayso. Sabababuhu waa ay badan yihiin, waxaana ka mid ah arrimo dhaqaale. Sidoo kale haweenka da'da yar waxa lagu dirqiyi karaa in ay aqbalaan guurka rag waaweyn oo awood badan, waxaana ay u arkaan in tahay waddo ay ku helayaan qayb awooddooda ka mid ah si ay uga nabadgalaan xadgudubyada ragga kale.[53]

52. Focus group discussion, Mogadishu.
53. KII interview, woman in the public sector.

# 12. Gunaanad

Cilmibaaristani waxa ay caddaysay caqabado badan oo isku murugsan, kuwaas oo ay haweenku kala kulmaan raadinta iyo joogtaynta shaqada, waxa ka mid ah: xeerarka shaqada ee jira, deegaanka shaqada oo u xaglinaya ragga, iyo faquuqyo iyo xadgudubyo. Dhibaatada ugu weyn ee ay si joogto ah u caddeeyeen kooxaha doodaha ka qaybgalay iyo kuwa la waraystayba waa baahida loo qabo xeerar iyo siyaasado lagu ilaaliyo xuquuqaha haweenka ee goobta shaqada, laga soo bilaabo shaqaalaysiinta illaa dallacsiinta oo ay helaan deegaan nabdoon oo aanay ka jirin tacaddi iyo xadgudubyo jinsi.

Maadaama ay Soomaaliya ka soo kabanayso khilaafaadka ka dhex jira, dhaqaaluhu waa rukun weyn oo ka mid ah horumarinta xasilloonida. Waaxda gaarka loo leeyahay oo si firfircoon loo dardargaliyo ayaa ah fursad lagu liibaani karo, laakiin waxa ay u baahan tahay in dhammaan heerarka kala duwan ee dawladdu ka qataan door hoggaamineed oo abuuraya jawi habboon. NDP-9 (2023) ayaa soo jeedisay in ilaalinta xuquuqda lahaanshaha hal-abuurka aqoonta ku dhisan, sharciyad ku habboon iyo fulinba loo baahan yahay si loo dhiirrigeliyo maalgelinta iyo hal'abuurka. Mid ka mid ah waaxaha laga ilduufay ayaa ah ganacsiyada ay haweenku leeyihiin, kuwaas oo lafdhabar u ah badbaadada qoysas badan. Bangiyo badan oo Soomaalidu leedahay ayaa faquuq ku haya ganacsatada aan haysan maalgelin iyo taageero ay ku hubiyaan in uu ganacsigoodu sii soconayo ama xitaa ballaadhanayo. In ay haweenku dakhli ka helaan shaqadooda waxa ay faa'iido u tahay bulshada oo dhan, gaar ahaan qoysaskooda hoose iyo kuwa qaraabadoodaba.

Faa'iidooyinka hablaha wax bartay waa kuwo togan, waara oo dhinacyo badan. Waxbarashada haweenku waxa ay keentaa dakhli sare, tirada ubad ah ee ay dhali doonaan, waxaana ay kor u qaaddaa cafimaadkooda. Sidoo kale waxa ay hoos u dhigtaaguurka carruurta.[54] Tani keliya ma horseeddo in ay dumarku ku bataan goobaha shaqada, laakiin sidoo kale waxa ay u horseeddaa hoggaaminta. Waxa ay sidoo kale yaraynaysaa heerka sare ee shaqo-la'aanta dhallinyarada; gaar ahaan haweenka.

Talooyinka warbixintaan ku yaallaa waxa ay bixinayaan habab la taaban karo, kuwaas oo lagu yarayn karo caqabadaha haweenku kala kulmaan goobta shaqada. Xaqiijinta in ay haweenku ka qaybgalaan dhaqaalaha ayaa ah dariiq ay Soomaaliya kaga gudbi karta saboolnimada ba'an; qoysaska waxsoosaarka leh oo ay haweenku hoggaamiyaan, dhaqaalaha oo la ballaariyo iyo in la kordhiyo xasilloonida dhaqaale iyo siyaasadeed ee dalka. Marka haweenku si buuxda uga qaybgalaan dhammaan qaybaha kala duwan ee horumarka waddanka waxa ay saamayn muhiim ah oo togan u leedahay Soomaaliya.

---

54. Somalia: Education Country Brief (January 2024); United Nations Education, Scientific, Cultural Organization (UNESCO); Available at: https://www.iicba.unesco.org/en/node/109

## 13. Talabixino

- Ma jiraan xeerar iyo siyaasado ku ilaaliya haweenka goobta shaqada. Qabya-qoraalka xeerka shaqaalaha (jaadka 3aad) waa in la qaataa, oo si degdeg ah loo hirgeliyaa.

- Heer qaran ahaan, waxa aad u muhiim ah in la hirgeliyo axdiga haweenka Soomaaliyeed, kaas oo dhigaya in la soo afjaro farqiga jinsi ee dhanka shaqada, iyo in labada jinsiba ay si siman uga shaqeeyaan dhammaan jagooyinka dawladeed oo ay ku jiraan guddiyada madaxa bannaan. Axdigu waxa uu sidoo kale dhigayaa kordhinta in ay haweenku ka shaqeeyaan shirkadaha gaarka loo leeyahay, gaar ahaan maamulka sare iyo hoggaaminta.

- Waxa loo baahan yahay in la qaato oo la hirgeliyo xeerar bixinaya tilmaamo cad, oo ay ka mid yihiin in laga ilaaliyo xadgudubka iyo ka-aargoosiga marka ay haweenku dacwoodaan. Arrimahani waa kuwo wax laga qaban karo, waxayna hoos imanayaan xilalka wasaaradaha horumarinta haweenka iyo xuquuqal-insaanka, shaqaalaha, arrimaha diinta iyo caddaaladda.

- Waxa lamahuraan ah in xuquuqda haweenka lagu ilaaliyo dastuurka KMG ee federaalka. Marka la joogo heer gobol, dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalku waa in ay qaataan oo hirgeliyaan xeerarka shaqada ee ilaalinaya haweenka shaqaalaha ah.

- Soomaaliya waa in ay sii waddaa in ay kaalinteeda ka qaadato masraxa caalamiga ah, iyada oo saxiixaysa oo ansixineysa xeerarka la xiriira shaqada iyo jinsiga oo ay ku jiraan CEDAW, Hab-maamuuska Axdiga Afrika ee Xuquuqda Dadka iyo Aadanaha ee Xuquuqda Haweenka Afrika (Hab-maamuuska Maputo), iyo xeerarka kale ee ilaalinaya xuquuqda haweenka.

- Hannaanka shaqaalaysiinta, haweenka waa in la siiyaa qoondo caddaalad ah oo ay kula tartamaan ragga, taas oo ay ku jirto in la siiyo ugu yaraan 30% qoondada jinsiga ee jagooyinka shaqaalaha dawladda. Taas oo lagu daray in ay jirto daah-furraan ku saabsan hannaanka dallacsiinta ee dhammaan waaxyaha dawladda oo dhan.

- Waxa muhiim ah in kaabayaasha goobaha shaqada ee dhammaan waaxyaha kala duwan la qiimeeyo si loo hubiyo in ragga iyo haweenku ay si siman u helaan adeegyada ay u baahan yihiin si ay shaqadooda u gutaan. Tan waxa ka mid ah goob xafiis oo ku filan, goobo gaar ah oo nadiif ah, si ay ugu tukadaan iyo sidoo kale qolalkii hooyada. Haddii ay tahay hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, gelitaanka musqulaha ee haweenku waa mid xaddidan, waana arrin u baahan in degdeg wax looga qabto.

- Waxa jira caqabado waaweyn oo ka jira waxbarashada gabdhaha. Wiilashu aad bay ugaga badan yihiin gabdhaha goobaha waxbarashada. Fursadaha waxbarashada ee gabdhaha waa in kor loo qaadaa, sida in laga daayo lacagta dugsiga.

- Waxa looga baahan yahay barayaal badan oo dheddig ah dhammaan heerarka waxbarashada, kuwaas oo u dhaqma sidii ilaaliyayaal iyo la-higsadayaal, iyaga oo hablaha ku dhiirrigelinaya in ay xasilaan oo ay dugsiga dhammeeyaan.

- Dawladaha, heer federal, heer gobol iyo heer degmo – waa in ay xaqiijiyaan in haweenka la siiyo dhaqaale, qalab iyo taageero bulsho si ay u guulaystaan.

- Waxa loo baahan yahay in haweenka loo fududeeyo galaangalka adeegyada bangiyada oo ay ku jiraan xisaabaadka bangiyada, in la siiyo tababarro aqoon maaliyadeed sida ganacsiga loo maamulo, iyo sida loo codsado deeqaha iyo deymaha.

- Haweenka badankoodu waxa ay ka shaqeeyaan waaxo aan rasmi ahayn, inta badan ganacsiyada yaryar. Si looga caawiyo haweenka in ay ballaariyaan ganacsiyadooda, waa in deeqo iyo deymo loo diyaariyaa. Sidaa oo kale waxaa muhiim ah in la horumariyo oo la hawlgeliyo taageerada ay dawladdu siinayso ganacsiyada ay haweenku leeyihiin.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org